**GOLAHA SHACABKA**
**EE**
**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

# XEER HOOSAADKA

## oo lagu kordhiyay wax kabadalidda iyo toosinta Golaha Shacbiga ku ansixiyay dib u eegistii kalfadhigii 3aad fadhiyadiisii 18aad 19aad ee 22-23-Oktoobar-2013

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 603
TR: 30/11/13
SAXIIX:

# GUDDIGA JOOGTADA EE GOLAHA SHACABKA

# ANSIXINTA

# XEER-HOOSAADKA GOLAHA SHACABKA

| Guddoomiyha Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Golaha wuxuu ku ansixiyey wadar oggol | |
| Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan | Taariikh: Oktobar, 2013 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad - Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Saxiixa: M.ne Jeylaani Iikar Nur | Taariikh: Oktobar, 2013 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka 2-aad - Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: Oktobar, 2013 |

CUTUBKA IAAD: ........ 1

GOLAHA SHACABKA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA ........ 1

Qodobka 1-aad: Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ........ 1

Qodobka 2-aad: Awoodaha Golaha Shacabka ee Baarlammaanka Federaalka Soomaaliya ........ 1

Qodobka 3-aad: Dhaarta Xildhibaannada ........ 3

CUTUBKA 2-AAD ........ 3

Isugu yeeridda Xubnaha iyo dhisidda Guddoonka Golaha Shacabka ........ 3

Qodobka 4-aad: Guddoomiyaha Ku-Meel-Gaarka ah ee Golaha ........ 3

Qodobka 5-aad: Qaabka loo dooranayo Guddoomiyaha Golaha iyo labadiisa ku xigeen ........ 3

CUTUBKA 3-AAD: ........ 5

GUDOONKA, XAFIISKA GOLAHA SHACABKA IYO GUDDIGA JOOGTADA EE GOLAHA ........ 5

Qodobka 6-aad: Gudoonka iyo xafiiska Golaha ........ 5

Qodobka 7-aad: Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka ........ 5

Qodobka 8-aad: Xilka Guddoomiye Ku-xigeenada Golaha Shacabka ........ 6

Qodobka 9-aad: Xil Waayidda Guddoomiyaha Golaha iyo Labadiisa Ku-xigeen. ........ 6

Qodobka 10-aad: Xilka Hab-dhowraha Golaha iyo Ku-xigeenadiisa. ........ 8

Qodobka 11-aad: Xilka Xoghayayaasha Golaha. ........ 8

Qodobka 12-aad: Guddiga Joogtada ee Golaha ........ 9

CUTUBKA 4-AAD: ........ 10

XUBNAHA GOLAHA SHACABKA ........ 10

Qodobka 13-aad: Xilka Xubnaha Golaha Shacabka ........ 10

Qodobka 14-aad: Xuquuqda Xubnaha Golaha ........ 11

Qodobka 15-aad: Xasaanadda xubnaha Golaha Shacabka ........ 12

Qodobka 16-aad: Ka Xaadirida Fadhiyada Golaha ........ 12

Qodobka 17-aad: Labbiska iyo Heybadda Xildhibaanka ........ 13

Qodobka 18-aad Waayidda Xubinimada Golaha Shacabka ........ 13

CUTUBKA 5-AAD ........ 14

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA ........ 14

Qodobka 19-aad: Doorashada Madaxweynaha ........ 14

Qodobka 20-aad: Eedeyn iyo Xil ka Qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda ........ 15

Qodobka 21-aad: Dhaarinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ........ 15

Qodobka 22-aad: Bannaanaanta Xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ........ 16

Qodobka 23-aad: Madaxweynaha & Golaha Shacabka ........ 16

CUTUBKA 6-AAD: ........ 16

KALFADHIYADA IYO FADHIYADA GOLAHA SHACABKA ........ 16

Qodobka 24-aad: Kalfadhiyada/fadhiyada Golaha Shacabka ........ 17

Qodobka 25-aad: Kalfadhiyada aan caadiga aheyn ee Golaha ........ 17

Qodobka 26-aad: Ajendaha ........ 18

Qodobka 27: Sida ay Isugu Xigaan Hawlaha Golaha ........ 18

Qodobka 28-aad: Guntanka (Quorum) ........ 19

Qodobka 29aad: Noocyada Codeynta ........ 19

Qodobka 30-aad: Habka dooda iyo Anshaxa ee Xubnaha ........ 20

**Qodobka 31-aad: Hadal jeedin** ......22
**Qodobka 32-aad: Dhexgal toosineed (Point of Order)** ......22
**Qodobka 33-aad: Xaqa ay xubinta u leedahay Jawaab celin** ......23
**Qodobka 34-aad: Ka Doodista Hindise Sharciyeedka ama Mooshinka** ......23
**Qodobka 35-aad: Hadal-jeedinta wasiirada** ......23
**Qodobka 36: Nidaamka Fadhiga Golaha** ......23
**Qodobka 37-aad: Daahfurnaanta Fadhiyada Golaha** ......24
**Qodobka 38-aad: Amniga Golaha Shacabka** ......25
**Qodobka 39-aad: Keydinta & xafidaada (records) Kalfadhiyada Golaha** ......25
**Qodobka 40-aad: Xushmada Istaaga iyo Fadhiga Golaha** ......26

**CUTUBKA 7-AAD:** ...... **27**

**HABRAACA ANSIXINTA SHURUUCDA** ...... **27**
**Qodobka 41-aad: Curinta Hindise Sharciyeedka** ......27
**Qodobka 42-aad: Soo Bandhigidda Hindise Sharciyeed .** ......27
**Qodobka 43aad: Soo Bandhiggida iyo Akhrinta Hindise Sharciyeedka** ......28
**Qodobka 44-aad: Saddex Jeer Akhrinta Hindise Sharci** ......28
**Qodobka 45-aad: U-gudbinta hindise sharciyeedka Guddiga u-xil-saaraan** ......29
**Qodobka 46-aad: Soo-Celinta Warbixinta Hindise Sharciyeedka ee Heerka labaad iyo u-gudbinta Guddiga** ......30
**Qodobka 47-aad: Wax-ka-bedelidda hindise sharciyeedka ka dib soo jeddinta warbixinta Guddiga loo gudibiyey** ......30
**Qodobka 48-aad: Habka Dooda Wax-Ka-Bedelidda Hindise Sharciyeed** ......31
**Qodobka 49-aad: Soo-Jeedinta (Motion) gabagabada Heerka Warbixinta** ......31
**Qodobka 50-aad: Akhrinta Sadexaad ee Dooda ama Wax-Ka-Bedelid ka dib** ......32
**Qodobka 51-aad: Hindise Sharciyeed Sugaya Saxiixa** ......33
**Qodobka 52-aad: Hindise sharciyeedka la diiday** ......33
**Qodobka 53aad: Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada** ......33
**Qodobka 54-aad: Dhaqangelidda Sharciyada** ......33
**Qodobka 55-aad: Durid Sharci** ......33

**CUTUBKA 8-AAD:** ...... **34**

**GUDDIYADA** ...... **34**
**Qodobka 56-aad: Xeerarka Guud** ......34
**Qodobka 57-aad: Waajibaadka Shaqo ee Guddiyada Golaha Shacabka** ......35
**Qodobka 58-aad: Guddoonka Guddiyada** ......36
**Qodobka 59-aad: Kulammada Guddiyada** ......36
Kulamada khaaska ah iyo kuwa guud ......37
Ajendaha (qodobada laga hadlayo) ......38
Soo xaadirista kulamada Guddiga ......38
**Qodobka 60-aad: Habka kulamada Guddiyada** ......39
Kooramka/Guntanka (tirada ugu yar ee kulan ku ansixi karo) ......39
Codeynta ......39
Dhageysiga dadweynaha ......40
**Qodobka 61-aad: Dib u eegista iyo ka warbixinta qoraalada sharciyada qabyada ah** ......41
**Qodobka 62-aad: Xiriirka guddiyada iyo xukuumadda** ......42
Barnaamijyada Shaqo ee wasaaradaha ......42
Xog raadinta Guddiga ......42
Baaritaannada uu sameeyo guddigu ......43
Warbixinta Guddiga ee Arrimaha la baaray ......43

Qodobka 63-aad: Guddi Hoosaadyada ....................................................................................44
Qodobka 64-aad: Qorsheyaasha Shaqo iyo Qoondeynta Miisaaniyadda Guddiga...........................44
Qodobka 65-aad: Shaqaalaha Guddiyada...............................................................................46
Qodobka 66-aad: Qoraalada guddiga.....................................................................................46
Qodobka 67-aad: Guddiyada Golaha Shacabka .......................................................................47

CUTUBKA 9-AAD:.................................................................................................. 55

HABRAACA MAALIYADDA......................................................................................... 55

Qodobka 68-aad: Hab-raaca Loo Ansaxiyo Miisaaniyadda Federaalka ..........................................55
Qododka 69-aad: Hab-raaca Lagu Ansixiinayo Kabid Miisaaniyadeedka Federaalka Iyo Wax Ka Badalka Miisaaniyadda Federaalka.....................................................................................57
Qodobka 70-aad: Habraaca Loo Ansixinayo Warbixinta Xisaab Xir Sanadeedka Kusaabsan Miisaaniyadda Federaalka.....................................................................................57
Qodobka 71-aad: Habraaca ansixinta miisaaniyad sanadeedka Golaha Shacabka...........................58

CUTUBKA 10-AAD:................................................................................................ 58

KORMEERIDA XUKUUMADDA................................................................................... 58

Qodobka72-aad. U Yeeridda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada.........................................58
Qodobka 73-aad: Kalsooni-Siinta Xukuumadda.......................................................................58
Qodobka 74-aad: Dhaarta Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada ............................................58
Qodobka 75-aad: Codka Kalsoni kala Noqoshada Xukuumadda ....................................................59
Qodobka 76-aad: Soo Jeedinta Kala noqosho Kalsooni.............................................................60
Qododobka 77-aad: Su'aal wadareedka (Interpellation)...............................................................60
Qodobka 78-aad: Suaal oraaheed oo Xukuumadda Looga Codsanayo Jawaab oraah ah .................61
Qodobka 79-aad: Su'aasha xukuumadda Looga Codsanayo Jawaab qoraal ah...............................62
Qodobka 80-aad: Duljoogga ay sameynayaan Guddiyada Golaha .................................................63

CUTUBKA 11-AAD:................................................................................................ 63

QODOBO ISKUJIR AH (MISCELLANEOUS) ................................................................... 63

Qodobka 81-aad: Guddiyadda Madaxbannaan ........................................................................63
Qodobka 82-aad: Maamulka Golaha Shacabka ........................................................................64
Qodobka 83-aad: Ku Dhawaaqida Xaalada Degdega ah ..............................................................64
Qodobka 84-aad: Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka ..................................................................65
Qodobka 85: Laalis.............................................................................................................65
Qodobka 86: Reebbanaanta hoos u dhigista iyo xaddidaada awoodda xeerkan ............................65

**CUTUBKA IAAD:**

**GOLAHA SHACABKA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA**

**Qodobka 1-aad:**

**Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

1. Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa wakiilka Shacabka Soomaaliyeed, waana awoodda ugu sarreysa ee sharci dajinta Dalka.
2. Golaha Shacabka wuxuu ka kooban yahay 275 Xubnood, sida ku xusan qodobka 64aad, faqradahiisa 2aad iyo 4aad ee Dastuurka.
3. *Qof kasta oo noqday Madaxweyne Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, qaanuun ahaan wuxuu noqonayaa Xildhibaan inta uu nool yahay, haddii aan xilka looga qaadin ka hor inta uusan dhameysan xilligiisa sida ku xusan Qod. 92-aad iyo qodobka 59-aad ee Dastuurka, wuxuuna xildhibaanada ku noqonayaa dheeri*".
4. Afafka rasmiga ah ee Goluhu waa Af-Soomaali (Maay & Maxaa Tiri), Afka *Carabiguna waa afka labaad*, sida ku xusan Qod.5aad (1) Dastuurka.
5. Xarunta Goluhu waa Magaala Madaxda Dalka ee Muqdisho.
6. Golaha Shacabka iyo Guddiyadiisa waxay xaq u leeyihiin in qaar ka mid ah fadhiyadooda ku qabsan karaan meel ka baxsan xaruntiisa, haddii ay duruuf kallifto, saasna ay go'aansadaan.
7. Muddada Golaha waa 4 (afar sano) oo laga bilaabayo Maalinta la dhaariyay Xildhibaanada ugu horeeya ee ka tirsan Golaha Shacabka (20.08.2012).

**Qodobka 2-aad:**

**Awoodaha Golaha Shacabka ee Baarlammaanka Federaalka Soomaaliya**

Goluhu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:

a) Ansaxinta, wax ka bedelka ama diidis hindise sharciyada la hor keenay;

b) Dejinta hindise sharciyeed marka laga reebo kuwa la xiriira Miisaaniyad sannadeedka.

c) Ansixinta miisaaniyad sannadeedka iyo xisaab xirkeeda.

d) Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka, ku Xigeenadiisa iyo xil ka qaadistooda.

e) Doorashada Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya,

f) Xil ka qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyada sida ku xusan qodobka 92-aad ee Dastuurka Ku-Meel-Gaarka

g) Kalsooni siinta Xukuumadda, ama u codeynta mooshin ku saaban u diidista ama kala noqoshada kalsoonida.

h) La xisaabtanka iyo u kuurgelidda Hayadaha Dowlada Federaalka si loo hubiyo fulinta sharciyada.

i) Dhisidda Guddiyo baara Hay'addaha Dowladda iyo xad gudubyada Xildhibaannada ay geystaan.

j) U-yeerida Ra'iisul wasaaraha, xubnaha Golaha wasiirada, iyo Gudoomiyayaasha Guddiyada Qaranka iyo xafiisyada Madaxa-bannaan.

k) **U kuur-gelidda** dhaqangelinta Dastuurka

l) Wax ka badelka Dastuurka, sida ku xusan Cutubka 15aad ee Dastuurka.

m) Sida waafaqsan Qodobka 113-aad ee Dastuurka, Goluhu wuxuu meel marinyaa xeerarka ku saabsan Guddiyada Madaxa-bannaan.

n) Ansixinta Guddiyada Madaxa-bannaan ee ay xubnaha Golaha Wasiirada horkeeno Golaha Shacabka.

o) Dejinta iyo wax ka beddelka Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka.

p) Ansixinta heshiisyada Caalamiga ah iyo heshiisyada ay Xukuumaddu la gasho Dowlado ama dhinacyo kale.

q) Oggolaashaha ama Diidida xaaladda deg-degga ah (State of Emmergency), ka dib marka ay soo jeediso Xukuumaddu[1].

[1] Faqradda Q ee qodobka 2aad oo horay u qornayd sidaan : " Oggolaashaha xaaladda deg-degga ah (State of Emmergency), ka dib marka ay soo jeediso Xukuumaddau.." waxaa loo badalay sida kor ku xusan , Golohuna wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 18aad ee 22/10/2013

**Qodobka 3-aad:**

**Dhaarta Xildhibaannada**

Xubin kasta oo ka mid ah Xildhibaannada Golaha Shacabka Federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya ka hor intuusan/inteysan qaban xilka wuxuu marayaa ama waxay mareysaa dhaarta hoos ku qoran:

***''waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahey inaan xilkeyga u guto si daacad ah oo ay ku jirto danta dalka, dadka iyo diinta, dhowrana Dastuurka Qaranka iyo shuruucda kale ee Dalka u yaala".***

**CUTUBKA 2-AAD**

**Isugu yeeridda Xubnaha iyo dhisidda Guddoonka Golaha Shacabka**

**Qodobka 4-aad: Guddoomiyaha Ku-Meel-Gaarka ah ee Golaha**

Fadhiga ugu horreeya ee Golaha Shacabka, inta laga dooranaayo Gudoomiyaha Golaha Shacabka iyo labadiisa ku-xigeen ee rasmiga ah, waxaa si ku-meel gaar ah u sii guddoominaya Xildhibaanka ugu da'da weyn xubnaha Golaha Shacabka.

**Qodobka 5-aad: Qaabka loo dooranayo Guddoomiyaha Golaha iyo labadiisa ku xigeen**

1. Si waafaqsan Qodobka 65aad (1) ee Dastuurka, Xildhibaanka ugu da'da weyn Golaha ayaa shirgudoominaya doorashada Guddoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen.
2. Guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa waxaa cod qarsoodi ah oo aqlabiyad ah ku dooranaya xubnaha Golaha Shacabka.
3. Marka ay banaanaato jagada Guddoomiyaha, xilka waxaa sii wadaya ku-xigeennada, Goluhuna shaqo kale ma qaban karo ilaa uu doorto Guddoomiye, taasoo ku dhaceyso 15 cisho gudahood haddii Kal-fadhiga furan yahay. Haddii kal-fadhiga xiran yahay, fadhiga ugu horeeya ee kal-fadhiga xiga ayaa lagu dooranayaa.
4. Murashaxiinta doonaysa in loo doorto xilka Guddomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeen, waa in ay yahiin Xubno ka tirsan Golaha Shacabka.
5. Murashax kasta waa in uu soo gudbiyaa qoraal muujinaaya rabitaankiisa, oo ay la socdaan Labo sawir iyo taariikh nololeedkiisa/nololeedkeeda (C.V).
6. Murashax kasta wuxuu qoraalkiisa ku soo qeexayaa jagada uu u tartamayo haddii ay tahay tan Guuddoomiyaha ama tan ku-xigeenada (1-& 2aad).

7. Xildhibaan kasta warqadda uu ku soo codeeyo wuxuu ku ridayaa sanduuq marka hore faaruq ah, dushana ka jeexan, gudihiisana uu muuqdo.
8. Codayntu waxay noqonaysaa ilaa seddex (3) wareeg:
   a) Wareega koowaad murashaxii hela codadka aqlabiyad tirada guud xubnha Golaha Shacabka ayaa ku guuleysanaayo doorashada sida ku xusan qod. 65-aad faqradiisa 4-aad ee Dastuurka. Haddii la waayo murashax hela tiradaas waxaa loo gudbayaa wareega labaad.
   b) Wareega labaad waxaa ka qeyb galaya afarta murashax ee hela tirada Codadka ugu badan ee wareegga koowaad. Haddii ay jiraan murashaxiin helay cod is la eg oo barbar- dhac ah, waa kawada qayb galayaan wareega labaad, oo tirada tartamayaasha ayaa kordhaysa. Murashaxii ku guulaysta codadka aqlabiyad tirada guud xubnha Golaha Shacabka ayaa ku guuleyssanaayo doorashada sida ku xusan qod.65aad faqradiisa 4aad ee dastuurka. Haddii la waayo waxaa loo gudbayaa wareega seddexaad.
   c) Wareega seddexaad waxaa ka qeybgalaya labada murashax ee ugu cododka badan wareega labaad. Haddii uu jiro murashax seddexaad oo heley tiro la siman mid ka mid ah labada murashax ee isku soo haray, wuxuu isaguna/iyaduna ka qeyb galayaa wareega seddexaad, waxaana doorashada ku guulaysanaya murashaxii hela cod hal dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyay.
   d) Haddii ay dhacdo in wareega 1-aad ka dib ay isku soo haraan labo murashax oo kaliya, sababtuna ay tahay tanaasul ay ka tanaasuleen tartanka musharaxiinta kale, waxaa si toos ah loogu gudbayaa wareega seddexaad ee ku xusan xarafka (C) ee isla qodobkaan, waxaana markaa meesha ka baxay wereegii labaad ee ku xusnaa xarafka (B) ee isla qodobkani. Labada murashax ee isku soo haray waxay ku kala guuleysanayaan cod hal dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyay. Markey codeyntu dhamaato wuxuu Guddoomiyaha KMG furayaa sanaadiiqda Codeynta, waxaana la tirinayaa codadka, ka dibna waxaa Guddoomiyaha KMG ku dhawaaqayaa ciddii ku guuleysatay jagada Guddoomiyaha Golaha.
9. Ka hor inta aanu xafiiska la wareegin, Guddoomiyuhu waa in uu ka tago xilka uu ka hayo xisbiga siyaasadeed, waana in uu shaqadiisa u guto si dhexdhexaad ah.

10. Doorashooyinka Guddoomiye ku-xigeenada, waxaa la waafajinayaa habraaca doorashada Guddoomiyaha

**CUTUBKA 3-AAD:**

**GUDOONKA, XAFIISKA GOLAHA SHACABKA IYO GUDDIGA JOOGTADA EE GOLAHA**

**Qodobka 6-aad:**

**Gudoonka iyo xafiiska Golaha**

**1.** Gudoonka iyo Xafiska Golaha Shacabka wuxuu ka kooban yahay:

a) Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

b) Guddoomiye ku xigeenka Koowaad.

c) Guddoomiye ku xigeenka Labaad.

d) Habdhowraha

e) Labadiisa ku-xigeen

**2.** Habdhowraha, ku xigeenadiisa waa in ay yihiin xubno ka tirsan Golaha waxaana soo magacaabaya Guddoomiyaha isagoo la tashanaya ku-xigeenadiisa, kadibna waxaa ansixinaaya Golaha oo ku meel marinaaya cod hal dheeri tirada xubnaha Golaha oo gacan taag ah, waxaana xilka ka qaadi kara isla Golaha oo ku meel marinaaya cod hal dheeri ah ka dib markii ay mooshin ka keenaan 25% ee xubnaha Golaha.

**3.** Labada Xoghaye waa in ay ka mid noqdaan hawl-wadeennada Golaha Shacabka

**Qodobka 7-aad:**

**Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

Guddoomiyaha Golaha Shacabka:

1. Wuxuu mas'uul ka yahay fulinta iyo dhowrista Xeer-Hoosaadka, ilaalinta nidaamka Golaha. Wuxuuna ilaalinayaa habsami usocodka howlaha Golaha sida sharci-dejinta, maamulka iyo hab-maamuuska.
2. Wuxuu furayaa, xirayaa fadhiyada, wuxuuna sheegayaa saacadaha, barnamijka iyo Ajandaha fadhiga soo socda oo qoraal ahaan lagu wargalinayo Golaha Shacabka.
3. Wuxuu hogaaminayaa Shirarka Golaha

4. Wuxuu kormeerayaa shaqada Hab-dhowrayaasha iyo Xoghayayaasha.
5. Wuxuu metelaa, kuna hadlaa magaca Golaha Shacabka taas oo aan ka horimaanaynin ama wax u dhimaynin hanaanka sharci-dejinta iyo go'aanada Golaha qaadan doono;
6. Wuxuu xiriiriyaa Golaha iyo Baarlamaanada Aduunka.
7. Wuxuu saxiixaa/saxiixdaa heshiisyada caalamiga ah ee Golahu la galo Baarlamaanada Aduunka iyo Hay'adaha kale ee khuseeya howlihiisa, kuwaas oo uu hor keenaayo Golaha.
8. Wuxuu kala tashan karaa ku-xigeenadiisa arrimaha siyaasadda iyo maamulka Golaha.
9. Wuxuu guddoominayaa Guddiga Joogtada ah iyo Guddiga Adeega Baarlamaanka.
10. Wuxuu kormeerayaa maamulka Golaha.

**Qodobka 8-aad:**

**Xilka Guddoomiye Ku-xigeenada Golaha Shacabka**

1. Guddoomiyaha Golaha Shacabka marka uu maqan yahay ama uusan qaban Karin xilkiisa, sabab kasta ha ahaatee, waxaa dhammaan howshiisii fulinaya Guddoomiye ku-xigeenka koowaad.Haddii uu isaguna maqnaado, waxaa howshiisa qabanaya guddoomiye ku xigeenka labaad ee Golaha.
2. Haddii ay dhacdo in Guddoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen ee Goluhu ay ka maqan yihiin ama aaney awoodin in ay soo xaadiraan ama ay guddoomiyaan, waxay xubnaha Golaha fadhiya cod hal dheeri ah (50%+1) oo gacan tag ah ku dooranayaan xubin si ku meel gaar ah u godoomisa kulankaas.

**Qodobka 9-aad:**

**Xil Waayidda Guddoomiyaha Golaha iyo Labadiisa Ku-xigeen.**

1. Guddoomiyaha Golaha iyo labadiisa ku-xigeen waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:
   a) Geeri
   b) Istiqaalo qoraal ah oo uu soo gudbiyay Golaha ama mid oraah oo uu ka sii daayay warbaahinta
   c) Maqnaansho cudurdaar la'aan ah oo gaaraysa 45 cisho oo isku xigta.

d) Ku xad gudub shareecada islaamka, Dastuurka Qaranka, Xeer Hoosaadka Golaha, ama shuruucda Qaranka.

e) Xil gudasho la'aan joogta ah sida:

i. Dhimirkiisa oo wax u dhiman (Waali), taasoo loo baahan yahay in uu soo cadeeyo gudi takhaatiir ah oo la aqoonsan yahay laguna kalsoon yahay

ii. Caafimaad daro joogta ah ama awood beelid uusan xilka la gudan Karin, taasoo loo baahan yahay in uu soo cadeeyo gudi takhaatiir ah oo la aqoonsan yahay, laguna kalsoon yahay

iii. Mar walba oo ay muddadu ka dhammaato

iv. Xukun Kama danabeys ah ay ku riday maxkamad awood u leh oo uu ku mutaysanaayo xabsi aan ka yarayn lix Bilood (6).

2. Moshin xil ka qaadis ee ku saabsan Xubin kasta oo ka mid ah Guddoonka Golaha, kuna salaysan asbaabaha ku xusan faqradda 1aad, xarfaheeda c,d,e (i,ii, iii,iyo iv), waxaa keeni kara xildhibaano aan tiradoodu ka yarayn seddax meelood meel (1/3) tirada guud ee Golaha. Codka xil ka qaadista wuxuu ku ansaxayaa aqlabiyad seddax meelood laba meel (2/3) ee xubnaha guud ee Golaha.
3. Soo jeedin moshin xil ka-qaadis ee ku aadan guddoomiyaha/ku-xigeenadiisa waa inuu ahaadaa mid sababeysan oo ku saleysan sharciga.
4. Moshinka xil ka-qaadista waxaa laga doodayaa loona codeynayaa (10) cisho oo maalin shaqo ah gudahood, laga bilaabo taariikhda moshinka la keeney Golaha.
5. Haddii Guddoomiyaha ama mid ka mid ah ku-xigeenadiisa ay soo wajahdo mooshin ah xilkaqaadis waxaa lamarayaa talaabooyinkan soo socda:

a) Guddoomiyaha ama ku-xigeenada laga keenay soo jeedinta (Motion) xilkaqaadida, waa in laga wareejiyo guddoominta fadhiyada, inta ay ka dhamaanayso arrinta la xiriirta soo jeedinta, codayntuna waa qarsoodi.

b) Haddii Guddoomiyaha ama Guddoomiye Ku-Xigeen uu lumiyo xilka, si waafaqsan qodobka 9 (2) ee xeerhoosaadka Golaha, Goluhu wuxuu Muddo shan iyo toban

(15) maalmood gudohood waa inuu ku doorto Guddoomiye ama ku xigeen cusub.

**Qodobka 10-aad:**

**Xilka Hab-dhowraha Golaha iyo Ku-xigeenadiisa.**

Habdhawraha Golaha iyo Ku xigeenadiisa iyagoo raacaya awaamirta Gudoomiyaha waxay u xilsaaran yihiin:

a) Dhowrista nidaamka Golaha;
b) Nabadgalyada, xasiloonida goobta iyo xubnaha Golaha;
c) Kormeerka iyo hubinta dhaqan-gelinta jadwalka safarrada xubnaha golaha;
d) Kormeerida, xanaanada Hantida Golaha;
e) Kormeeridda xafladaha, dhowrista hab maamuuska, ilaalinta qaab fadhiga golaha; iyo martida.
f) Wixii kale oo howl ah ee Guddoonku u xilsaaro.

**Qodobka 11-aad: Xilka Xoghayayaasha Golaha.**

Xooghayayaasha Goluhu waxay u xilsaaran yihiin:

1. Inay hubiyaan in la wargaliyey Xildhibaanada wakhtiyada shirarka iyo kal-fadhiyada Golaha. Wargalinta waa in ay noqotaa mid qoraal ah iyadoo lagu lifaaqayo nuqul ajendaha shirka Xildhibaanada, waana in lagu wargaliyaa 24 saac ka hor, haddaan Guddoonku muujin xaalad deg-deg ah.
2. Kormeerka shaqaalaha Golaha marka ay gudanayaan waajibaadka hoos ku qoran:
    a) Hubinta diyaarinta iyo u qeybinta qoraalada ay xubnuhu u baahan yihiin fadhiga ka hor.
    b) Hubinta guntankada (quorum) kadib markuu Guddoonka codsado
    c) Diiwaangalinta magacyada Xildhibaanada doonaya inay hadlaan ayadoo la tixgalinayo sidii ay u soo kala hor codsadeen.
    d) Hubinta qaadista maxdarrada (minutes) fadhiga Golaha.
    e) Tirinta codadka xildhibaannada; la bixiyay iyo arrimaha kale ee Golahu go’aan ka gaaray, hadal qoraalka, hadalada iyo sixitaanka.

f) Hubinta saxnimada qoraalada iyo xannaanada buuga diiwaangelinta xaadirinta xubnaha Golaha .

g) Hubinta in dhammaan go'aannada iyo xeerarka Golahu soo saareen ay raad-raac sax laga reebo si wannagsanna loo diiwaangeliyo.

3. Wuxuu u soo bandhigaa xubnaha ajendaha maalinkaasta bilawga fadhiga.
4. Wuxuu Guddoomiyaha Golaha la saxiixayaa Qoraallada maxdarrada fadhiyada Golaha.

**Qodobka 12-aad:**

**Guddiga Joogtada ee Golaha**

1. Guddiga Joogtada ee Goluhu wuxuu ka koobnaanayaa: Guddoomiyaha, labadiisa ku xigeen, habdhowraha iyo labadiisa ku-xigeen, iyo dhamaan guddoomiyayaasha guddiyada Golaha Shacabka.
2. Guddoomiyaha Golaha ayaa guddoominaya Guddiga Joogtada ah.
3. Xilka iyo waajibaadka Guddiga Joogtada ah waa sida soo socota:

a) Wuxuu diyaariyaa isla markaana maamulaa barnaamijyada iyo howlaha kalfadhiyada Golaha;

b) Wuxuu diyaariyaa isla markaana maamulaa jadwal-qorsheedka fadhiga Golaha.

c) Guddiga Joogtada ahi waxuu u gudbiyaa Gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waxii war bixin ah ee ku saabsan wax qabadka iyo baahida Guddiyada Golaha Shacabka, sidoo kale waxay u gudbiyaan Guddiga waxii qorsho howleed ah ee ka soo baxa Gudoonka ayadoo loo marsiinayo Gudoomiya kasta guddigiisa in uu gaarsiiyo ama ka warbixiyo[2];

d) Illaa iyo inta laga dhisayo xafiiska guddiga adeega baarlamaanka (PSC), wuxuu diyaarinayaa sanad miisaniyadeedka Golaha Shacabka una gudbinayaa ku talagalka Miisaaniyadda golaha shacabka si loo ansaxiyo islamarkaana xakameyn miisaaniyadeed loogu sameeyo hawlaha dhaqaale ee Golaha;

e) Wuxuu go'aan ka gaaraa, qeybiyaana miisaaniyad sanadeedka shaqo ee guddiyada golaha;

[2] Farqadda 3aad xarafka C oo u qornayd sidatan " Wuxuu xiriiriya hawlaha Golaha iyo guddiyada golaha" waxaa loo badalay sida kor ku qoran , Golohuna wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 18aad ee 22/10/2013

f) Wuxuu tixgaliyaa barnaamijka shaqo ee guddiyada golaha oo ay ka mid yihiin haddii loo baahanyahay socdaal iyo kulamo lagu qabanayo meelo ka baxsan dhismaha Golaha.

g) Wuxuu ka doodaa, go'aanna ka gaara warbixinta guddiyada ee looga doodi doono golaha.

h) Guddoomiyaha ayaa magacaabaya Xoghayaha Guud iyo labada Xoghaye ka dib markuu kala tashto Guddiyadda.

**CUTUBKA 4-AAD:**

**XUBNAHA GOLAHA SHACABKA**

**Qodobka 13-aad:**

**Xilka Xubnaha Golaha Shacabka**

1. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Shacabka marka ay xilkeeda gudaneyso waa in ay ku shaqaysaa sida ay danta qaranku ku jirto.
2. Iyada oo oofinaysa waajibaadka ku cad faqradda (1) ee qodobkan, xubin kasta oo ka mid ah Golaha Shacabka, xil gaar ah ayaa ka saaran matilaadda degaan-codbixiyeyaasha laga soo doortay, iyadoon loo eegin siyaasad iyo taageerid xisbiyo kale.
3. Xilliga fasaxa, Xildhibaanada waxaa looga baahan yahay arrimaha soo socda:
    a) Haddi xaaladda nabadgelyo ay saamaxdo, waa in muddo aan ka yareeyn 15 cisho la soo joogaan degaaanada ay matalaan;
    b) In ay qabtaan kulamo guud ay bulshada kula socodsiinayaan arrimaha Golaha horyaalo si ay ugala tashtaan;
    c) In ay kala hadlaan hormunarinta midnimada qaranka, nabadda iyo dib-u-heshiisiinta
    d) In ay kala tashadaan arrimaha guud ee ay daneynayaan & baahida deegaanka.
    e) In ay Golaha uga soo gudbiyaan warbixin qoraal ah waxii ay kala soo kulmeen booqashadooda hawleed

**Qodobka 14-aad:**

**Xuquuqda Xubnaha Golaha**

1. Xuquuqda Gunno ee Guddoonka iyo Xildhibaanada waxay ka bilaabanaysaa maalinta loo dhaariyo xilka waxayna u kala baxdaa:
    a) Gunno Xileed bille ah
    b) Gunno Fadhi
    c) Gunno deegaan
    d) Gunno caafimaad
    e) Gunno gaadiid
    f) Sahay Safar Shaqo
2. Faah-faahinta iyo Qaddarka Gunnooyinkaas waxaa habeynaya xeer gaar ah oo uu Golaha soo saari doono.
3. Wixii xaquuq ah ee ka maqnaada Xildhibaanadda muddada ay xilka hayeen, waxaa waajib ku ah xukuuumad kasta oo timaada in ay bixiso xaquuqda uu muteystay oo buuxda.
4. Xildhibaan kasta oo dib loo soo dooran waayo wuxuu xaq u leeyahay laba bilood gunno sagootis ah sannadkiiba oo ku jaango’an mudadii uu soo shaqeeyay waxaana lagu soo saarayaa sharci gaar ah.
5. Xildhibaanka laga qaaday xasaanadda wuxuu haysanaa gurigii iyo gaadiidkii dowladda, wuxuuna qaadanayaa Gunnooyinkiisa oo dhan marka laga reebo gunno fadhi, hase yeeshee kama qeyb galayo fadhiyada golaha mana yeelanayo cod, ilaa iyo inta maxkamadu arrintaas ka gaareyso xukun kama-dambays ah.
6. Haddii xildhibaanka la eedeeyey lagu waayo dembigii wuxuu xaq u yeelanayaa in la siiyo dhamaan xuquuqdii ka baaqatay.
7. Daaweynta Xildhibaanada iyo Xubnaha Qoyska (Xaaskiisa/odaygeeda iyo Caruurtooda) Waxaa damaanad Qaadeysa Dowladda.
8. Muddada Haweenka Xildhibaanada ah ay ku jiraan fasaxa dhalmada waxay xaq u leeyihiin in la gaarsiiyo Dokumentiga la xiriira howlaha Golaha, go’aanada uu gaaro, fadhiyada caadiga iyo kuwa aan caadiga ahayn bishii hal mar.

9. Wixii la xiriira fasaxa dhalmada iyo muddadiisa waxaa la waafajinayaa Shuruucda dalka.
10. Xildhibaankasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo ciidan suga amnigiisa[3].

**Qodobka 15-aad:**

**Xasaanadda xubnaha Golaha Shacabka**

**1.** Xubnaha Golaha Shacabka waxa ay leeyihiin xasaanad, sida ku xusan qodobka 70-aad ee Dastuurka.

**2.** Markii Xildhibaan laga qaadayo Xasaanada waa in ay ogolaadaan aqlabiyad hal dheeri ah tirada guud ee Xubnaha Golaha (50% + 1) iyadoo tirada Golaha laga reebayo kuraasta bannaan (post Vacnati) ee sababtey Geeri, tanaasulid ama si sharci ah u banaan.

**Qodobka 16-aad:**

**Xaadirida Fadhiyada Golaha**

1. Xildhibaan kasta waxaa waajib ku ah inuu soo xaadiro fadhiyada Golaha.
2. In diwaangelinta Xildhibaannada la bilaabo 09:00 Am [4]
3. In Guddoonka Baarlamaanka uu soo fadhiisto halki loogu talagalay 10:00 Am Shirkuna uu furmo
4. Haddii aan la helin Guntanka(Quorum), in Guddoonka Baarlamaanka uu dib u dhigo furitaanka fadhiga muddo hal saac ah
5. Guntanka haduu buuxsami waayo saacaddaas kadib gudoonku faddhiga wuu xirayaa
6. Haddii la gaaro 11:00Am waxaa la joojinayaa diwaangelinta Xildhibaannada waxaana buuga (liiska) loo gudbinayaa Xafiiska Golaha Shacabka.
7. Mudanayaasha ka soo dabamara 11:00Am, waxaa lagu qori doonaa liis gaar ah.
8. Soo daahidda shan(5) maalmood waxay lamitahay maqnaansho hal maalin , waxaana laxisaabinayaa dhamaadka kalfadhi kasta
9. Xilliga shaqada golaha waa inta u dhaxaysa 09:00Am ilaa 01:00 Pm

---

[3] F.G Faqradda 10aad ee Qodobka 14aad waa Faqrad cusub oo lagu kordhiyey. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[4] F.G Faqradda 2aad ilaa Faqradda 12aad ee Qodobka 16aad waa Faqrado cusub oo lagu kordhiyey. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 18aad ee 22/10/2013 .

10. Haddii xilliga shaqada ay dhammaato balse ay yaallin ajendooyin muhiim ah una baahan in laga doodo, Guddoonku wuxuu Golaha Shacabka u soo jeedin karaan in dooda la sii wado

11. Tirada ugu badan ee mar kaliya fasax ku maqnaan karta waa in aysan ka badan 50 Xildhibaan.

12. In fasaxa Guddoonka uu bixinayo uusan ka badnaanin 30 cisho(teel-teel ama xiriir ah) halkii kalfadhi

13. Xildhibaankii fasax la'aan ama cudur-daar la'aan ka maqnaado fadhiyada (3) maalmood shaqo oo isku xiga, wuxuu muteysanayaa digniin qoraal ah, hadduu misna cudurdaar la'aan maqnaado muddo gaaraysa todobo (7) Cisho oo xiriir ah ama teel-teel ah soddon Cisho gudahood, waxaa lagu ganaaxayaa 1/5 Gunno fadhiyeedkiisa. Wixii maqnaasho ah ee ka badan muddada la soo sheegay waxaa loo

14. gudbinayaa warbixinteeda Guddoonka Golaha si loo hordhigo Guddiga Hubinta iyo Anshaxmarinta.

15. Haddii Xildhibaanku soo xaadiro billowga fadhiga, kadibna iska baxo fasax la'aan iyadoo fadhigii weli socdo, wuxuu la mid yahay lana xukun yahay Xildhibaan ka maqan fadhiga.

**Qodobka 17-aad:**

**Labbiska iyo Heybadda Xildhibaanka**

Waxaa ka reeban Xildhibaanka Golaha Shacabka inuu Golaha ku yimaado muuqaal aan ku habooneyn heybaddiisa oo aan waafaqsaneyn shareecadda Islaamka.

**Qodobka 18-aad:**

**Waayidda Xubinnimada Golaha Shacabka**

Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka Waxaa Lagu Lumin Karaa[5]

a. Xubinta oo Geeriyoota
b. Xubinta oo ay la soo gudbanaato xaalad xilgudasho la'aaneed oo joogto ah
c. Xubinta oo istiqaalad u gudbisa aqalka ay xubinta ka tahay, lagana oggolaado
d. Ka- maqnaansho labo kalfadhi oo caadi ah, iskuna xiga ayada oo aanay jirin sabab maangal ah
e. Hadii ay xubintu aqbasho xil dawladeed aan wasiie ka ahayn
f. Haddii la hakiyo xuquuqdiisa muwaaddinnimo, sida ku cad sharciga

---

[5] F.G Dhamaan Qodobka 18aad waxaa loo bedalay sida ku xusan kor. Golohuna wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

## CUTUBKA 5-AAD

## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA

### Qodobka 19-aad:

### Doorashada Madaxweynaha

**Doorashadda Madaxweynaha waxey u dhaceysaa si waafaqsan hab-raaca soo socda:**

**1.** Goluhu waa inuu doorto Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka:

   a. 15 Maalmood kaddib marka uu qabsoomo fadhiga ugu horeeya ee golaha cusub ee la doortey, ama.,

   b. 30 maalmood gudahood, kaddib marka ay banaanaato jagada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

2. Goluhu wuxuu dhisayaa guddi doorasho oo ku meel gaar oo si qoto dheer u eegaya buuxinta shuruudaha murashaxnimo una kormeeraya diyaarinta iyo maamulka Doorashada Madaxweynaha.

3. Ugu yaraan saddex meelood labo (2/3) tirada guud ee golaha sida ku cad Qod.89 farqadiisa (2) ee Dastuurka waa inay joogaan u codeynta doorashada Madaxweynaha Federaalka, waxaana guddoominaya Guddoomiyaha golaha shacabka. Haddi uu Guddoomiyaha maqan yahay waxaa guddoominay ku-xigeenka kowaad ama kan labaad haddi ku-xigeenka kowaad maqan yahay.

4. Ka hor doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Gudoomiyuhu wuxuu u yeerayaa xubnaha golaha in ay soo bandhigaan musharaxiinta xilka Madaxweyne

5. Ugu yaraan 20 xubnood ee Golaha ayaa taagyeeri kara musharax Madaxweyne iyaga oo Golaha u soo gudbinaya mooshin sheegaya magaca, taariikh nololeedka iyo khibrada masharaxa xilka Madaxweyne

6. Murashaxa jagada Madaxweynaha waa inuu buuxiyaa shuruudaha ku qeexan qodobka 88 aad ee Dastuurka.

7. Qaabka loo hagayo doorashada Madaxweynaha waxaa loo raacayaa talaabooyinka ku cad Qodobka 89-aad eeDastuurka.

**Qodobka 20-aad:**

**Eedeyn iyo Xil ka Qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda**

1. Haddii Guddoomiyaha Golaha ay soo gaarto mooshin ay soo gudbiyeen ugu yaraan seddex dolool hal (1/3) tirada guud ee golaha ee soo jeedinaya Xil-ka-qaadidda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya marka lagu eedeeyo khiyaano-qaran, xadgudub culus oo Dastuuri ah ama ku-xadgudub sharciyada kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Guddoomiyihu wuxuu u gudbinayaa mooshinka maxkamada Dastuuriga si si loo ogaado in mooshinku yahay mid leh sababo sharci iyo in kale sida ku cad qodobka 92aad ee Dastuurka.
2. Haddii Maxkamada Dastuuriga ahi go'aamiso in mooshinka uu ku saleeysan yahay sababo sharciga waafqsan, Guddoomiyaha Golaha ayaa qabanqaabinaya fadhiga Golaha si looga dooda mooshinka. Madaxweynaha xilka ayaa laga qaadayaa haddii ugu yaraan seddex dolool labo (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha ay taageeraan mooshinka madaxweynaha.
3. Ilaa iyo inta laga gaarayo doorashada madaxweynaha cusub, Guddoomiyaha Golaha ayaa sii heynaya xilka Madaxweynaha.

**Qodobka 21-aad:**

**Dhaarinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**

Inta uusan xilka bilaabin, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu Golaha Shacabka Federaalka hortiisa ku marayaa dhaar, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, dhaartaas oo ah sidan:

*"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u gudanaayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, dhawrana Dastuurka qaranka iyo shuruucda kale oo dalka u yaalla".*

**Qodobka 22-aad:**

**Bannaanaanta Xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**

1. Haddii uu bannaanaado xafiiska Madaxweynaha, waxaa qabanaya xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka ilaa laga soo dooranayo Madaxweynaha cusub muddo aan ka badnayn soddon (30) maalmood gudahood.

2. Haddii Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu ku dhaco xanuun aan karaysasho lahayn muddo ka badan seddex(3) bilood oo ay caddeeyeen xeeldheerayaal caafimaad waxaa sharciyan bannaanaanaya xilka xafiiska Madaxweynaha
3. Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya beddelaya Madaxweyne mansabkiisi bannaanaaday sida ku xusan Faqrada 2aad ee Qqodobkan waxaa loo marayaa habraaca dorashada Madaxweynaha ee ku xusan Qodobka 89 aad ee Dastuurka
4. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya ee lagu doorto si waafaqsan Faqrada 3aad ee Qodobkan wuxuu dhameystirayaa muddada xilhaynta ee u harsaneyd madaxweynahii ka horeeyey.

**Qodobka 23-aad: Madaxweynaha & Golaha Shacabka**

1. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu hadal ka jeedin karaa Golaha Shacabka Munaasabadaha soo socda sida ku xusan qodobka 90-aad ee Dastuurka, Xarfahiisa (g), (h) iyo (i)
    a) Furitaanka Kalfadhiyadda Golaha.
    b) Wuxuu la hadlayaa fadhi gaar ah ee Golaha Shacabka sanadkiiba mar.
    c) Wuxuu la hadli karaa Golaha Shacabka mar kasta oo kale.
2. Madaxweynaha waxaa ka reeban inuu ka qeyb galo fadhiyada caadiga ah ee Golaha Shacabka

## CUTUBKA 6-AAD:

## KALFADHIYADA IYO FADHIYADA GOLAHA SHACABKA

### Qodobka 24-aad:

### Kalfadhiyada/fadhiyada Golaha Shacabka

1. Golaha Shacabka wuxuu sanadkiiba yeelanayaa labo kala-fadhi oo caadi ah. Kalfadhi kasta ee Baarlmaanka wuxuu soconayaa muddo afar bilood ah.

2. Kalfadhiga Hore ee Golaha Shacabka wuxuu furmayaa **20 August** wuxuuna xirmayaa **20 December** Kalfadhiga Dambe ee Golaha Shacabka wuxuu furmayaa **20 February** wuxuuna xirmayaa **20 June.**[6]
3. Kalfadhi kasta marka uu dhamaado wuxuu Goluhu qaadanayaa laba bilood oo fasax.
4. Haddii sababo Jira awgood, kalfadhiyada ay raaci waayaan qaabka kor ku xusan, markaas waxaa kalfadhiga la dhigayaa taariikhda ugu horeysa ee suurta galka ah.
5. Fadhiyada ama kalfadhiyada waxaa ay soconayaan ilaa laga dhammeeyo ajendaha hor yaalla golaha iyo hindisa sharciyeedyada degdegga ah.
6. Goluhu wuxuu qaban karaa kalfadhiyo aan caadi aheyn.

**Qodobka 25-aad: Kalfadhiyada aan caadiga aheyn ee Golaha**

Iyadoo la waafajinayo sida uu qabo qodobka 66-aad, faqradisa 4-aad ee Dastuurka, Kalfahdiyada aan caadiga aheyn ee Golaha waxaa la isugu yeeri kara Guddoomiyaha Golaha:

a) Marka uu Madaxweynaha J.F. Soomaaliya ka soo dalbado isagoo tixgelinaaya codsiga uga yimid Golaha Wasiirrada isla markaasna uu Guddoonku ku soo lifaaqaa codsigii Golaha wasiirrada iyo Madaxwaynaha loo qaybiyaa Golaha[7].

b) Marka uu helo codsi qoraal ah oo ka yimid boqolkiiba labaatan (20%) xubnaha Golaha Shacabka.

c) Gudoomiyaha Golaha Shacabka

**Qodobka 26-aad:**

**Ajendaha**

1. Guddiga Joogtada Arrimaha Golaha wuxuu diyaarin doonaa ajendaha fadhiyada soo socda ee Golaha. Ajendaha waxaa loo qeybinayaa xildhibaanada Golaha ugu yaraan 48 saacadood ka hor fadhiga loo dhanyahay.

---

[6] F.G: Faqradda 2aad ee Qodobka 24aad waa Faqrad cusub oo lagu soo kordhiyey Qodobka . Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

7 F.G: Xarafka (A) ee qodobka 25-aad oo marki hore u qornaa sidaan " Marka uu Madaxweynaha Soomaaliya ka soo dalbado isagoo tixgelinaaya codsiga uga yimid Golaha Wasiirrada" waxaa loo bedalay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

2. Ajendaha waxaa loo tixgalinayaa in la ansaxiyay, haddii aysan ugu yaraan 10 xildhibaan ay bilowga fadhiga u gudbinin Guddoomiyaha Golaha mooshin qoraal ah oo wax lagaga bedelayo ajendaha iyagoo soo jeedinayo arrin deg-deg ah. Mooshinkana waa in ay ku saxiixan yihiin xubnaha taageeraya.
3. Ajendaha hadii ay codsadaan 10 xildhibaan in wax cusub lagu daro ama wax laga badalo waxaa gudoonka laga doonayaa in uu ku soo daro ajendaha isla fadhigaas hadii ay u codeeyaan (50% + 1) ee tirada fadhida[8].

Qodobka 27:

**Sida ay Isugu Xigaan Hawlaha Golaha**

Marka uu qabanayo howshiisa, Goluhu wuxuu raacayaa nidaamkan hoos ku qoran:

a) Guddoomiyaha ayaa shirka furaay sheegayana tirada joogta
b) Akhrinta aayadaha Quraanka kariimka
c) Ansixinta ajendaha maalintaas
d) Dhaarinta xubnaha cusub haddii ay jiraan
e) Waqtiga Su'aalaha weydiinta (Question time)
f) Su'aal wadareed (interpellation debate)
g) Soo jeedinta Gudoomiyaha
h) Hindisa sharciyeedka marayo akhrinta koowaad.
i) Hindisa sharciyeedka marayo akhrinta labaad.
j) Warbixinta guddiyada
k) Hindisa sharciyeedka marayo akhrinta sadexaad.
l) Mooshinada la keenay.

**Qodobka 28-aad: Guntanka (Quorum)**

1. Aqlabiyada tirada guud ee xubnaha Golaha ayaa noqonaysa guntanka (Quorum)

8 F.G: faqradda 3-aad ee qodobka 26-aad oo marki hore u qornaayd sidaan: Guddoomiyaha ayaa go'aanka gaaraya waqtiga Golaha loogu yeerayo in ay u codeeyaan mooshinka wax looga bedelaayo ajendaha" waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

2. Go’aannada kasoo baxa shirarka Golaha waa sax/sharci haddii guntan uu jiray xilligii codka la qaadayay. Guddomiyaha ayaa xaqiijinayo guntanka (Quorum) inta aan codka la qaaadin, isaga ayaana go’aan ka gaaraya goor walba ee la hubinayo guntanka.
3. Ka hor intuusan Golaha codeyn, xubin kasta oo Golaha ka tirsan waxay codsan kartaa in la hubiyo guntanka taasoo guddoonka ku khasbeysa inuu hubiyo guntanka.
4. Codbixin kasta oo u baahan tiro cayiman, oo aan ka aheyn kuwa u baahan cod hal dheeri ah ee xubnaha jooga, inta aysan cod bixinta dhicin, Gudoomiyaha waa in uu hubiyaa in ay fadhiyaan tirada loo baahanyahay ee ay ku ansaxeyso cod bixintaas.
5. Haddi ansixinta mooshin ama qodob ajendaha uu u baahan yahay tiro sadex meelood labo meel, ugu yaraan sadex meelood labo ee xubnaha Golaha Shacabka waa in ay xaadir yihiin codka ka hor.

**Qodobka 29aad:**

**Noocyada Codeynta**

1. Cod-bixinta waxay u dhaceysaa siyaabaha soo socda:
    a) Gacan taag
    b) Cod qarsoodi ah
    c) Cod-bixin qoraal ah (Magac u yeerid)
2. Cod-bixinta qarsoodiga waxaa loo sameynayaa sida soo socota:
    a) Guddoomiyaha Golaha waa inuu diyaariyaa sanduuqa cod-bixinta
    b) Guddomiyaha Golaha waa in uu sharxaa habraaca codeeynta
    c) Guddoomiyaha Golaha waa inuu amraa yeerista magacyada xubnaha iyo u qeybinta xubnaha xaashida lagu codeeyo.
    d) Guddoomiyaha waa inuu xaqiijiyaa xubnaha codeeyey, kuwa ka aamusey iyo kuwa xumaaday, kadibna wuxuu ku dhawaaqaa natiijada codbixinta.
3. Cod-bixin qoraal ah (magac u yeerid) waxaa la qabanayaa markuu guddoomiyaha golaha ama ugu yaraan 10 xubnood sidaas codsadaan, golahuna go,aankaa qaato. Marka la qaadayo cod-bixin qoraalah (magac u yeerid), xubin kasta oo codeysa magaceeda hortiisa ayaa lagu qorayaa codkeeda (haa/maya) ama maqnaanshaheeda waana in lagu hor qoraa magaciisa/magaceeda oo buuxa.

4. Sharci ahaan, haddii codeynta mooshin la hor keenay Golaha ay barbar dhac noqoto, mooshinkaas ma meel marayo. Haddii cod-bixinta ay gacan taag tahay, Guddoomiyaha ayaa codeynayo si uu u kala saaro labada dhinac markay is bar bar dhac noqdaan
5. Marka laga reebo cod-bixinnada qarsoodiga ah iyo cod bixin magac u yeerid ah oo Goluhu ogolaaday sida ku qeexan Dastuurka ama Xeer Hoosaadkan , dhammaan cod-bixinnada kale ee caadiga ah waa gacan tag, loona tiriyaa safba mar
6. Xubnaha jooga fadhiga balse aan ka qeyb qaadan cod-bixinta waxaa loo xisaabinayaa sida codadka xubnaha aamusay oo kale.
7. Inta looga dhawaaqayo natiijada cod-bixinta, xubin golaha ka tirsan looma ogola In ay hadal u jeedisa Golaha
8. Haddii la ogaado in ay jiraan khalad ku yimid cod-bixinta qarsoodiga ah ama codadka la riday ay ka badan yihiin tirada xubnaha jooga, Guddoomiyaha wuxuu burinayaa natiijada cod-bixinta wuxuuna isla markiiba qabanayaa cod-bixin kaloo cusub. Natiijada cod-bixin kasta waxaa ku dhawaaqaya guddoomiyaha Golaha isago sheegaya tirada codadka ogolaaday ama diiday iyo codadka hallaabay.

**Qodobka 30-aad: Habka dooda iyo Anshaxa ee Xubnaha**

1. Xildhibaan walba wuxuu xaq u leeyahay in si xor ah u cabiro lana xurmeeyo ra'yigiisa marka Golaha laga dhex doodayo.
2. Iyadoo la fulinaayo faqradda kor ku xusan, xubnaha Golaha waa in ay si hagaagsan ugu dhaqmaan qodobada so socda:-
    a) Xubin kasta waxaa laga doonayaa in ay fekerkeeda u cabirto si kooban oo cad iyadoon ka baxayn qodobka laga hadlayo, laguna celcelin ereyo isku mid ah, ilaalinaysana waqtiga loo qararay.
    b) Xubin walba Waxaa waajib ku ah in ay run ka sheegto qodobka ay ka hadlayso.
    c) Waxaa waajib ku ah xubin kasta in uusan hadalkeedu xiisad kicineyn, khalkhalna gelineyn wadanka iyo shacbkaba.
    d) Xubin kasta waa in ay ilaalisaa sharafta iyo xasaanada Aqalka, xubnaha iyo ha'adaha kale.
    e) Soojeedinta xubin walba waa in ay ku salaysan tahay mabaadiida iyo fekerada uu tageeraayo ama kaga hor imaanaayo, iyadoo la dhawraayo xubnaha kale.

f) Xubinta cabiraysa fekerkeeda laguma samayn karo dhexgal, gunuunuc,qaylo, sacabin, foori iyo wixii kale ee dhaqan xumo ah.

g) Xubina ma hor keeni karto Golaha ra'yi aan waafaqsanayn ajendada xiliga fadhiga hortaal, hadaanu ogolaan Guddomiyuhu.

h) Xubina kama bixi karto fadhiga, ka dib markii ay jeediso fekerkeeda.

i) Xubina kuma qaybin karto ducumenti aanu fasaxin gudoomiyuhu.

j) Waxaa ka reeban xubnaha in ay qalalaaso ka sameeyaan Baarlamaanka iyo agagaarkiisa.

k) Waxaa reeban in xubnuhu u tanaagoodaan ama u il jebiyaan martida golaha fadhida.

l) Waxaa reeban in laga baxo fadhiga marka Guddomiyuhu hadlayo ama ay socoto cod bixin.

m) Waxaa reeban in lala yimaado, calaamado, qoraalo, sloogano iyo dhawaaq muujinaya is hortaag howlaha golaha.

n) Xiliga uu hoogaaminayo guddomiyuhu shirka looma tegi karo waxna looma sheegi karo, xoghaynta ayaa wixii qoraal ah loo marinayaa.

3. Xubintii rabta in ay hadal jeediso waxay raacaysaa talaabooyinkan:

a) xubin walba waxay ku bilaabaysaa hadalkeeda" Mahadsanid Guddomiye"

b) Waxay isticmaalaysaa " Xildhibaan" marka ay tilmaamayso xubin kale, ama " Mudane/Murwo" marka ay sheegayso qof kale oo madaxda ka mid ah.

c) Xubintii rabta in ay hadasho waxay taageysaa gacanta iyadoo aan qaylin, kicin ama ficil kale sameyn.

d) Xubina ma hadli karto, calaamadna kuma muujin karto Ra'yigeeda haduusan Guddomiyuhu u ogolaan.

e) Xubintii hadasha ayadoon guddomiyuhu u ogolaan wuu ka joojinayaa hadalka, wuxuuna hadalka siinayaa cidii ku xigtay.

**Qodobka 31-aad: Hadal jeedin**

## Waxaa hadal jeedin leh:

1. Xubin kasta oo ka tirsan Golaha Shacabka oo is diwaan galisay, Guddoomiyuhuna fasaxay.
2. Xubinta codsanaysa in la siiyo hadalka waa in uu wargaliyaa xoghayaha. Gudoomiyaha golaha ayaa siinayo xubnaha hadalka sida ay isugu xigaan.
3. Xubin ka tirsan golaha kama haldi karto arrin ku saabsan hal mowduuc in ka badan hal mar, haddii arrintaas aysan aheyn mid shakhsi ah oo isaga saameyneysa, ama la xiriirta xeer hoosaadka ama cadeyn ku saabsan arrin aan hore looga hadlin lana xiriirta mowduucaasi.
4. Xubin in ka badan labo jeer digniin ka hela sabab la xiriirta ka bixida mowduuca laga doodayo ama aanan hadalkiisa ku dhameysan mudada la siiyey sida ku xusan faqrada 2aad, Gudoomiyuhu waxuu ka joojinayaa hadalka.
5. Haddii si kale uusan u go'aansan Goluhu, hadalka xubinta Golaha kama badnaan karo toban (10) daqiiqo.
6. Ka hadalka arrimaha ajendaha kama badnaanayo shan (5) daqiiqo.
7. Guddoomiyaha Golaha ayaa u oggolaan kara xubin inay hadasho waqti ka badan muddada la qeexay haddii uu u arko macquul.

**Qodobka 32-aad: Dhexgal toosineed (Point of Order)**

1. Xubin kasta waxay codsan kartaa dhexgal toosineed *(Point Of Order)* iyadoo ay xubno kale hadalkooda wataan.
2. Guddomiyaha wuxuu siini karaa fursad xubinta ka codsata dhexgal toosineed (point of order) haddii uu u arko sax
3. Marka la aqbalo codsiga dhexgalka toosinteed (point of order), xubinta waxay si toos uga hadlaysaa qodobka uu u istaagay/istaagtay isagoo/iyadoo soo koobaya/koobaysa, kamana hadli karo arin ka baxsan qodobka uu u istaagay.

**Qodobka 33-aad: Xaqa ay xubinta u leedahay Jawaab celin**

1. Xildhibaan ama wasiir kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu jawaab deg-deg ka bixiyo dood/hadal lagu xusay magaciisa.
2. Xaqa jawaab celinta ee ku xusan kor (1 ) waxaa lagu xadidayaa labo(2) daqiiqo,

3. Haddii xildhibaan ama wasiir isticmaalo xaqa jawaab celinta sida ku xusan (1), waxaa loo ogolyahay xubintii jawaab celintii laga qaatay is-difaacid ku kooban hal daqiiqo.

**Qodobka 34-aad: Ka Doodista Hindise Sharciyeedka ama Mooshinka**

Ka doodista hindise sharciyeed ama mooshinka waa in ay u kala horeysaa sida soo socda:

a) Cidda keentay hindise sharciyeedka ama mooshinka
b) Guddoomiyaha guddiga ay khuseyso Hindise sharciyeedka.
c) Guddomiyaasha Guddiyadda joogtada ah
d) Haddii aaney xukuumadu keenin hindise sharciyeedka Golahu wuxuu Xukuumada weydiin karaa aragtideeda/fikerkeeda.
e) Xubnaha kale ee Golaha waxay u hadlayaan sida uu u kala siiyo hadalka Guddoomiyuhu. Kadib markay dooda dhamaato, cida keentay hindiso sharciyeedka ama mooshin waxay xaq u leedahay in ay jawaab bixiso. Intaa, kadib guddoomiyaha golaha ayaa soo xiraya dooda isagoo dalbanaya codeynta xubnaha golaha ee ku aadan hindiso sharciyeedka ama mooshinka.

**Qodobka 35-aad: Hadal-jeedinta wasiirada**

Fadhi kasta oo Golaha u dhanyahay, codsi uu ogolaaday Guddoomiyaha Golaha ka dib, wasiir kasta wuxuu ka hadli karaa arrin kasta ee hoos imaaneysa xeen-daabka waajibaadkiisa. Kadib markuu hadalka jeediyo, Guddoomiyaha Golaha wuxuu ogolaanayaa wixii fikir ku biirin ah ama su’aal ah ee Golaha uu qabo ama xubin ka mid ah Golaha. Wasiirka hadalka jeediyay wuxuu xaq u leeyahay inuu jawaab kooban ka yiraahdo wixii fikir ku biirin ah ama su’aal ee loo soo jeediyay.

**Qodobka 36: Nidaamka Fadhiga Golaha**

1. Guddoomiyaha Golaha ayaa ilaalinaya nidaamka Golaha. Guddoomiyaha Golaha wuxuu fari karaa inuu nidaamka ilaaliyo xubin kasta oo Golaha ama Xukuumadda ka tirsan markii:-
    a) Xubin hadleysa ay ka baxdo arrintii dooda u furneyd
    b) Xubin ay ku kacdo fal carqaladeynayo nidaamka shaqada Golaha
    c) Xubin ku kacda anshax xumo ama dhaqan aan habooneyn
    d) Xubin isticmaasha luqad hadal ahaan iyo qoraalba aan ku habooneyn Golaha Shacabka.

e) Xubin hurisa colaad, isticmaasha luqad ay ku dheehan tahay anshax-xumo, gaf, sharaf-dil, hanjabaad iwm.
f) Xubin garab marta ama ixtiraami waayo awooda xilgudashada Guddoomiyaha Golaha
g) Xubin si ula kac ah ku gardarroota ama hor istaagto Habdhowraha oo fulinayo amarka Guddoomiyaha Golaha.

2. Xubin ama wasiir waa inay u hogaansanaato amarka uu bixiyo Guddoomiyaha Golaha ee ku saabsan hab dhaqanka loogu baaqay xubintaas ama wasiirkaas inay dhowrto, kaasoo ay ka mid yihiin tallaabooyinka soo socda:
    a) Ka noqoshada isticmaalka luuqad aan Golaha ku habooneyn
    b) In uu islamarakaas soo afjaro hadalka
    c) fadhiyada Golaha shacabka oo laga saaro oo ay ka mid yihiin kulammada guddiga intamaalintaas ka harsan
    d) In la demiyo telefoonada gacanta waqtiga uu socdo fadhig Golaha
3. Haddii Goluhu dhexdiisa ka dhasho nidaam darro aad u baaxad weyn, Guddoomiyahu Golaha wuxuu islamarkaaba dib u dhigi karaa fadhiga maalinta xigta.

**Qodobka 37-aad: Daahfurnaanta Fadhiyada Golaha**

1. Fadhiyada Golaha waxay u furanyahiin dadweynaha haduusan Golaha si kale u go'aamin. Fadhiyada Golaha waa laga baahin karaa warbaahinta iyadoo la tixgalinayo go'aanka Guddiga Arrimaha Golaha.
2. Dadka kale ee loo ogolaaday in ay ka qeyb-galaan waa in ay fadhiistaan meela khaas ah oo ka soocan kuraasta xubnaha. Waa In ay aamusnaadaan, ayna muujin calaamad aqbalaad ama diidmo.Hab dhawraha ama ku xigeenadiisa ayaa markuu Guddoomiyahu amro ka dib dibbeda u saaridoona cidii u hogaansami waydo nidaamka Golaha.
3. Dadka loo ogolaaday in ay dhageysataan doodaha waa In ay haystaan kaarka martida oo ayna muujiyaan waqti kasta lagana aruuriyo dhamaadka fadhiga ka dib ama haddii dibedda loo saaro sida ku xusan farqada 2aad ee qodobkan loona sheegaa saraakiisha amniga si dacwad loogu qaado.

4. Marti/dhageeyste kasta oo u gefa sharafta iyo karaamada Golaha ama xubin ka tirsan Golaha waxaa lagu wareejinayaa saraakiisha amniga si tallaabo sharciga waafaqsan looga qaado
5. Guddiga Joogatada Arrimaha Golaha wuxuu soo saari karaa xeer ku aadan hab-dhaqanka dadweynaha, wakiilada ka socda saxaafada iyo ciddii kale oo dhageysanaysa fadhiga Golaha. Guddoomiyaha Golaha wuxuu ku amrayaa cidii u hogaansami waydo xeerarkani in ay ka baxdo dhismaha Golaha. Hey'ada amniga ee Golaha Shacabka waa in ay islmarkiiba fuliyaan amar kasta ee kasoo baxa guddoomiyaha golaha ee arrintan kusaabsan.

**Qodobka 38-aad: Amniga Golaha Shacabka**

1. Waa waajibaadka Guddoomiyaha inuu hubiyo amniga Golaha Shacabka. Guddoomiyaha wuxuu amri karaa Hab-dhawraha inuu qaado tallaabooyinka loo baahan yahay ee lagu xallinayo xaalad iyadoo la isticmaalayo ciidanka amniga.
2. Waxaa ka reebban qof-kasta inuu dhismaha Golaha la galo hub. Haddii xubin golaha ka tirsan uu diido inuu hubka ku wareejiyo ciidamada amniga, mid ka mid ah hab-dhawrayaasha ayaa la ogeysiinayaa. Haddii xubintaa ay ku sii adkeysato in ay dhinac marto amarka hab-dhowraha waxaa arrintaa loogudbinayaa Guddoomiyaha si uu xubintaa tallaabo haboon uga qaado.
3. Ciidanka amniga ma gali karo xarunta Golaha haduusan Guddoomiyaha ka codsan In ay soo faragaliyaan
4. Cid kale oon ka aheyn xubnaha iyo shaqaalaha maamul ee golaha ma gali karaan xarunta Golaha haddii aysan fasax ka haysan Hab-dhawraha

**Qodobka 39-aad: Keydinta & xafidaada (records) Kalfadhiyada Golaha**

1. Hadal qoraalka (minutes) ayaa noqonaya keydinta rasmiga ah (official record) ee waxa uu qabtay Golaha waxaana diyaarinayo Xoghayaha Golaha.
2. Hadal qoraalda fadhiga Golaha waxaa saxiixaya Xoghayaha Golaha shacabka ee shaqada leh si u uu xaqiijiyo hadal qoraalka in uu saxanyahay.
3. Hadal qoraalada Golaha waxaa lagu xusayaa:
   a) Lambarka fadhiga
   b) Waqtiga iyo goobta fadhiga lagu dhigay

c) Cidda Guddoominaysay fadhiga
d) Xubnaha kasoo qeyb galay, haddii ay joogeen ilaa gabagabada fadhiga ama ay ka joogeen qeybkaliya.
e) Xubnaha maqan ee fasax qaatay
f) Xubnaha maqan ee aanan fasax qaadan
g) Ajendaha maalintasi
h) Soo koobidda arimaha laga hadlay iyo go'aamada la qaatay fadhiyada.
i) Waqtiga la xiray fadhiga.
j) Go'aamada Guddomiyaha ee la xiriira habraaca ogolaashaha soojeedimada inta uu fadhigu socday

4. Hadal qoraalka waxaa ansixinayo Golaha fadhiga xiga ee Golaha. Haddii la waayo xubin ka soo horjeeda, hadal qoraalka waxaa loo qaadanayaa in si wada jir ah loo ansixiyey. Kaliya xubnaha soo jeedinaya wax ka badal ama faahfaahin fikradooda ayaa ka hadli karo hadal qoraalka.
5. Nuqulka rasmiga ah (original copy) ee hadal qoraalka waxaa keydinayo Xoghayaha Guud ee Golaha.
6. Hadal qoraalka waxaa loola jeedaa keyd qoraal oo koobaya waxa laga hadlay.
7. Duubista codka ama muuqaalka waxaa loola jeedaa dhamaan duubista waxa laga yiraahda fadhiyada buuxa iyo kuwa guddiyada
8. Gabagabada fadhi kasta, hadal qoraalada iyo dokumiindiyada kale (other records) waxaa lagu keydinayaa keydka golaha iyo bogga internetka loona fasaxaya dadweynaha sida uu sharciga farayo.

**Qodobka 40-aad: Xushmada Istaaga iyo Fadhiga Golaha**

1. Xubnaha waa inay istaagayaan marka dadka hoos ku qoran soo galaan Golaha:
    a) Madaxweynahay jamhuuriyada Federaalka Soomaliya.
    b) Guddoomiyaha Golaha ama sii hayaha xilka Gudoomiyaha
    c) Madaxweyne shisheeye ee lagu martiqaaday ama wakiilkiisa.
    d) Guddoomiye Barlaamaan ee dal kale

e) Marka la fadhiyo Golaha, Guddoomiyaha, labada guddomiye kuxigeen iyo xubin kasta oo uu Guddoomiyaha ku marti qaaday kalfadhiga waxaa ay fadhiisanayaan xubnaha hortooda. Habdhowraha, ku-xigeenadiisa iyo xoghayaha waxaa ay fadhiisanayaan meel ka hooseysa meesha uu fadhiyo guddoomiyaha. Xubnaha dowlada waxaa ay fadhiisanayaan dhinaca bidix ee ka soohorjeeda guddoomiyaha.

## CUTUBKA 7-AAD:

## HARBRAACA ANSIXINTA SHURUUCDA

### Qodobka 41-aad: Curinta Hindise Sharciyeedka

Waxaa hindise sharciyeed soo bandhiggi kara:

1. Golaha Wasiirada; ama
2. Ugu yaraan 10 Xubnood oo ka tirsan Golaha Shacabka, marka laga reebo hindise sharciyeed la xiriira misaaniyad sanadeedka, taasoo ka imaneneysa Golaha Wasiirada.

### Qodobka 42-aad: Soo Bandhigidda Hindise Sharciyeed[9]

1. Xukuumadda waxay codsan kartaa in loo soo hormariyo shuruucda ay mudnaanta siinayso ama shuruuc qabyo ah oo loo baahan yahay ama dhameystirka Hindise sharci qabyo ah, doodiisuna socoto[10].
2. Xukuumaddu waxay Hindise Sharciyeed u soo bandhigi kartaa Golaha labada bilood ee ugu horeysa kalfadhi kasta[11]

---

[9] F.G: ciwaanka qodobka 42-aad oo marki hore u qornaayd sidaan" Soo Bandhiggidda Hindise sharciyeed Deg-Deg ah" waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[10] F.G: Faqradda 1-aad ee qodobka 42-aad oo marki hore u qornaay sidaan "Xukuumadda waxay awood u leedahay soo bandhiggida hindise sharciyeedyo deg-deg ah ama shuruuc qabyo ah oo loo baahan yahay ama dhameystirka Hindise sharci oo qabyo ah, doodiisuna socoto" waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[11] F.G: Faqradda 2-aad ee qodobka 42-aad waa faqro cusub oo lagu soo kordhiyay qodobka. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

**Qodobka 43aad: Soo Bandhiggida iyo Akhrinta Hindise Sharciyeedka**

1. Hindise sharciyeed walba (sharci qabya ah) wuxuu la xiriira soo jeedin codsi ogolaansho oo qaab mooshin leh (**motion for leave**) halkaas oo ay ku caddahay tilmaanta Hindise Sharciyeedka
2. Hindise Sharciyeed waliba waa in xubnaha Golaha loo qaybiyo 48 saac ka hor inta uusan marin akhrinta kobaad[12].
3. Soo jeedin (Motion) soo bandhigaysa hindise sharciyeed cusub waxay , ka gudbeysaa akhrinta koowaad haddii aan laga keenin wax dood ah, wax-ka-bedelid ama su'aal.
4. Hindise sharciyeed kasta (sharci qabyaa) ee la keeno Golaha Shacabka waa in ay ku lifaaqan yihiin arimaha soo socda:

   a) Faahfaahin ku saabsan arrimaha sharcigu xallinayo, ujeedooyinka iyo saameynta sharcigu xambaarsan yahay iyo in uu waafaqsan yahay Dastuurka
   b) Caddeyn ku saabsan saameynta dhaqaale ee sharcigu leeyahay sanadka kowaad iyo mustaqabalka

**Qodobka 44-aad: Saddex Jeer Akhrinta Hindise Sharci**

1. Hindise Sharciyeed walba waa in laga hor-akhriyaa Golaha Shacabka sadex jeer oo kala duwan, sadax maalmood oo kala duwan, ka hor intuusan ansax noqon[13].
2. Akhrinta koobaad waxaa akhrinaya cidii keentay Hindise Sharciyeedka, akhrinta labaad (oo ah Xiliga soo jeedinta warbixinta Guddiga iyo dooda Golaha) iyo sedaxaad (oo ah akhrinta nuqulka Hindise Sharciyeeedka oo dhamaystiran oo ay ku jirto talo soo jeedintii xubnaha Golaha Shacabka) waxaa akhrinya Guddiga ay Howshiisu la xiriirto Hindise Sharciyeedkaas.[14]

---

[12] F.G: faqradda 2-aad ee qodobka 43-aad waa faqro cusub oo lagu soo daray qodobka. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[13] F.G: Faqradda 1-aad ee qodobka 44-aad oo marki hore u qornaay sidaan "Hindise sharciyeed walba waa in laga hor-akhriyaa Golaha Shacabka sadex jeer oo kala duwan, sadax maalmood oo kala duwan, ka hor intuusan ansax noqon. Haddii ay jirto arrin deg-deg ah ama qayrul-caadi ah, soo jeedinta hindise sharciyeedka waxay noqon kartaa labo ama sadex jeer, ama hal maalin gudaheed ayaa laga gudbi karaa dhowr marxaladood" waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[14] F.G: Faqradda 2-aad ee qodobka 44-aad waa faqro cusub oo lagu soo kordhiyay qodobka. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013.

3. Hindise Sharciyeedku marka uu ka gudbo Akhrinta koobaad waa in loo gudbiyaa Guddiga ay hawlihiisu la xariiraan, ka hor inta aan soo jeedin (motion) wax--ka-bedelid aan lagu sameyn[15].
4. Akhrinta koobaad ee Hindise Sharciyeedka laga hor—akhrinayo Golaha Shacabka, dooda Goluhu waa in ay ku koobnaato mabaadi'da guud iyo ujeedada Hindise sharciyeedka sida ku xusan qodobka 43-aad farqadisa 3-aad xarfaha (A & B). Dhinaca soo jeeediyay hindise sharciyeed, ha ahaado xubin golaha ka mid ah ama Wasiir, waxaa loo ogolaanayaa in uu bixiyo faahfaahin dheeraad ah ee qeexeysa qodobada Hindise Sharciyeedkaas.Wax kabadal lama sameynayo akhrinta kowaad[16].

**Qodobka 45-aad: U-gudbinta hindise sharciyeedka Guddiga u-xil-saaraan**

1. Marki uu hindise sharciyeedku ka soo gudbo akhrinta koowaad, waa in si dhaqsa ah loogu gudbiyaa Guddiga (u-xilsaaran) si uu uga doodo ugana talo bixiyo isagoo la kaashanaya cid walba oo aqoon u leh ama uu quseeyo Hindise Sharciyeedka ka dibna dib ugu soo celiyo Golaha Shacabka[17].
2. Marka uu Guddigu ka doodayo hindise sharciyeedka, qodobbada waxaa looga doodayaa sida yu kala horeeyaan
3. Golaha Shacabka waa in lagu wargeliyaa wixii soo jeedin wax-ka-bedelid ah ee Guddiga ku dhaqaaqay. Hindise sharciyeed walba ee Guddi soo bandhigo, wax ha laga beddelo

---

[15] F.G: Faqradda 3-aad oo marki hore ahayd faqradda 2-aad balse hada noqotay faqradda 3-aad, faqradda 2-aad oo lagu soo daray owgeed waxay marki hore u qornaayd sidaan " Hindise sharciyeed walba waa in la akhriyaa labo jeer kadibna loo gudbiyaa Guddiga ay hawlihiisu la xariiraan, ka hor inta aan soo jeedin (motion) wax-ka-bedelid lagu sameyn" waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[16] F.G: Faqradda 4-aad oo marki hore ahayd faqradda 3-aad balse hada noqotay faqradda 4-aad, faqradda 2-aad oo lagu soo daray owgeed waxay marki hore u qornaayd sidaan " Waqtiga labaad ee hindise sharciyeedka laga hor-akhrinayo Golaha Shacabka, dooda goluhu waa in ay ku koobnaato mabaa'idiida guud iyo ujeedada hindise sharciyeedka. Dhinaca soo jeeediyay hindise sharciyeed, ha ahaado xubin golaha ka mid ah ama Wasiir, waxaa loo ogolaanayaa in uu bixiyo faahfaahin dheeraad ah ee qeexeysa qodobada hindise sharciyeedkaas. Wax kabadal lama sameynayo heerkan" waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

17 F.G:Faqradda 1-aad ee qodobka 45-aad oo marki hore u qornaayd sidaan " Markí uu hindise sharciyeedku ka soo gudbo soo jeedinta labaad, waa in si dhaqsa ah loogu gudbiyaa Guddiga (u-xilsaaran) si uu ula kaashado qof walba oo aqoon u leh mowduuca ka dibna dib loogu soo celiyo Golaha Shacabka. waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

ama yaan laga beddelin, waa in loo soo gudbiyaa Golaha Shacabka iyadoo ay la socoto warbixin qoraal ah.

**Qodobka 46-aad: Soo-Celinta Warbixinta Hindise Sharciyeedka ee Heerka labaad iyo u-gudbinta Guddiga**

1. Golaha Shacabka waa in lagu wargeliyaa wixii soo jeedin wax-ka-bedelid ah ee Guddiga ku dhaqaaqay. Hindise Sharciyeed walba ee Guddi soo bandhigo, wax ha laga beddelo ama yaan laga beddelin, waa in loo soo gudbiyaa Golaha Shacabka iyadoo ay la socoto warbixin qoraal ah[18]
2. Warbixinta mid ka mid ah guddiyada goluhu uu ka bixiyey Hindise Sharciyeed hore loogu gudbiyey si loo mariyo akhrinta labaad, lagama doodi karo (3) saddex maalmood ka hor laga bilaabo markii loo qeybiyey xubnaha Golaha Shacabka[19].

**Qodobka 47-aad: Wax-ka-bedelidda hindise sharciyeedka ka dib soo jeddinta warbixinta Guddiga loo gudbiyey**

1. Ujeedada qodobkani ee la xariira wax-ka-bedelidda hindise sharciyeedka heerka soo jeedinta Warbixinta Guddiga waxaa loola jeedaa in xubnaha aan ka mid ahayn Guddiga ka baarandegay hindise shirciyeedka ay fursad u helaan wixii soo jeedin ah ama wax-ka-bedelid mucayin ah ee loo baahanyahay, taasoo ah wixii ka dhimanaa howshii Guddigu hore u soo qabtey
2. Guddoonka Golaha Shacabka awood ayuu u leeyahay in uu kala qaado ama isku daro talooyin wax-ka bedelid ama qodobo kala duwan marka lagu guda jiro doodda Warbixinta Guddiga.Wuxuu kaloo awood u leeyahay, haddi uu u arko sidaas, in uu ka codsado xubinta soo jeedisay wax-ka-bedelidda in ay ka bixiso faahfaahin kooban si Guddoonka fikir uga qaato.

[18] F.G: faqradda 1-aad ee qodobka 46-aad waa faqro laga soo raray qodobka 45-aad. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

19 F.G: faqradda 2-aad ee qodobka 46-aad oo markii hore u qornaayd sidaan" Warbixinta mid ka mid guddiyada goluhu uu ka bixiyey Hindise Sharciyeed hore loogu gudbiyey si loo mariyo akhrinta labaad, lagama doodi karo mudo ka yar todobo (7) cisho laga bilaabo markii loo qeybiyey xubnaha Golaha Shacabka. waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

3. Guddoonka uma soo jeedin karo Golaha Shacabka qodob wax-ka bedelid ah oo hore Guddiga u xil-saaran hindise sharciyeedku u arkay mid aan waafaqsaneyn sharciga. Howsha Guddoonka waxay ku kooban tahay qodobada ama arrimaha uu Guddiga waqti ama fursad u waayey in uu kusoo lafa-guro
4. Guddoomiyuhu wuxuu Golaha u soo bandhigi karaa (si looga doodo) soo jeedin wax ka badalid oo hore ay u diideen guddiga u xil saarnaa, haddii uu u arko mid muhimadeeda leh, mudanna in tix gelin dheeraad ah la siiyo, haddii aysan Guddigu soo jeedintaas ku diidin ka hor imaasho sharci[20].
5. Guddoonka ma aqbali karo codsi dood galin wax ka badalid la xiriirta oo keeni kara qas iyo isku dir, lehna dabeecad soo noqnoqosha ama ujeedada laga leeyahay ee tahay in si macno darraah u dheereeyo hannanka dib-u-eegista (dooda) ee Warbixinta (Guddiga)

**Qodobka 48-aad: Habka Dooda Wax-Ka-Bedelidda Hindise Sharciyeed**

1. Soo jeedin walba ee wax-ka-bedelid ah oo wargelinteeda waafaqsan tahay Xeer-Hoosadka waa laga doodi kara waxna waa laga badeli karaa
2. Haddi la ogolaado in laga doodo warbixin (Guddi), Xubin walba waxaa loo ogol yahay in ay hadasho mar qura, waqti aan ka badneyn 10 daqiiqado iyadoo xaq u yeelaneysa soo jeedin wax-ka-bedelid kasta ee Warbixinta (Guddiga).

Dooda la xiriirta wax-ka-bedelid hindise sharciyeed dib ayaa loo dhigi karaa muddo usbuuc ah haddii sidaas ay codsadaan ugu yaraan 10 xubnood oo ka duwan xubnihii soo bandhigay wax-ka-bedelidda ama inta badan xubnaha Guddiga ku shaqo leh

**Qodobka 49-aad: Soo-Jeedinta (Motion) gabagabada Heerka Warbixinta**

Marka ay soo afjaranto ka doodidda hinisde sharci laba goor akhris maray , waxaa la soo gudbinayaa soo jeedin (motion) ku aadan ogolaanshaha wax ka bedelka hindise sharciyyeedkaa ama in sidiisa loo qaato.

---

[20] F.G faqradda 8-aad ee qodobka 47-aad oo marki hore u qornaayd sidaan " Guddoomiyuhu wuxuu Golaha u soo bandhigi karaa (si looga dodo) soo jeedin wax ka badalid oohore ay u diideen guddiga u xil saaranaa, haddii uu u arko mid muhimadeeda leh, mudanna in tix gelin dheeredd ah la siiyo, waxaa loo qoray sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

**Qodobka 50-aad: Akhrinta Sadexaad ee Dooda ama Wax-Ka-Bedelid ka dib**

1. Haddii Hindise Sharciyeed golaha laga hor-akhriyey laba jeer, waxna laga bedelay ama dood la geliyey waqtiga warbixinta Guddiga la soo bandhigayey, waa in loo gudbiyaa akhrin sadexaad. Kadibna lagu ansixiyaa saddex maalmood kadib[21].
2. Marka Hindise Sharciyeedka ka gudbo akhrinta sedexaad Qodobada la doonayo in wax laga bedelo waa in lagu wargeliyaa Gudoomiyaha Golaha Shacabka iyadoo qoraal ah, Kaasoo ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan 10 Xubnood, 24 – saac ka hor inta aan la ansixin Hindise Sharciyeedka[22]
3. Wixii soo jeedin wax-ka-bedelid ah ee ku saabsan Hindise Sharciyeed la hor keenay Golaha Shacabka waa in loo qeybiyaa Xubnaha Golaha iyadoo qoraal ah. Haddii xubinihii soo bandhigay ka noqdaan wax ka beddelkii ay soo jeediyeen, xubin kasta oo golaha ayaa soo jeedin karta isla wax-ka-beddelkii oo uu ka noqday soo jeediyihi hore[23]
4. Haddii Guddoonka Golaha Shacabka uu u arko wax-ka-bedelid Hindise Sharciyeed mid aan sharciga waafaqsaneyn waa in lagu celiyaa xubnihii soo bandhigay [24]
5. Haddii 10 xubnood isla soo bandhigeen soo jeedin wax-ka bedelid Hindise Sharciyeed, Guddoonka ayaa tilmaamyo Xubinta soo jeedin doonta wax-ka-bedelidaas.[25]

---

[21] F.G: faqradda 1-aad ee qodobka 50-aad oo markii hore u qornaayd sidaan " Haddii Hindise Sharciyeed golaha laga hor-akhriyey laba jeer, waxna laga bedelay ama dood la geliyey waqtiga warbixinta Guddiga la soo bandhigayey, waa in loo gudbiyaa akhrin sadexaad laguna ansixiyaa fadhiga xiga ee Golaha Shacabka, waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

22 F.G: Faqradda 2-aad ee qodobka 50-aad waa faqradi 2-aad ee qodobka 47-aad oo loo soo raray qodobkaan marki horane u qornaayd sidaan " Qodobada la doonayo in wax laga bedelo waa in lau wargeliyaa Gudoomiyaha Golaha Shacabka iyadoo qoraal ah, Kaasoo ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan 20 Xubnood, 24 – saac ka hor inta aan Warbixinta Guddiga la soo jeedin, waxaa loo qoray sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[23] F.G: Faqradda 3-aad ee qodobka 50-aad waa faqradi 3-aad ee qodobka 47-aad oo loo soo raray qodobkaan marki horane u qornaayd sidaan " Wixii soo jeedin wax-ka-bedelid ah ee ku saabsan hindise sharciyeed la hor keenay Golaha Shacabka waa in loo qeybiyaa Xubnaha Golaha iyadoo qoraal ah. Haddii xubintii soo bandhigtay ka noqoto wax ka beddeliki ay soo jeedisay, xubin kasta oo golaha ayaa soo jeedin karta isla wax-ka-beddeliki oo ka noqday soo jeediyihi hore" waxaa loo qoray sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[24] F.G: Faqradda 4-aad ee qodobka 50-aad waa faqradi 4-aad ee qodobka 47-aad oo loo soo raray qodobkaan marki horane u qornaayd sidaan " Haddii Guddoonka Golaha Shacabka uu u arko wax-ka-bedelid hindise sharciyeed mid aan sharciga waafaqsaneyn waa in lagu celiyaa xubintii soo bandhigtay" waxaa loo qoray sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

**Qodobka 51-aad: Hindise Sharciyeed Sugaya Saxiixa**

Hindise Sharciyeed wuxuu sharci noqonaaya marka uu maro habraaca sharci dejinta ee ku xusan Dastuurka Qod 85 iyo Xeer-hoosaadka Golaha kadibna uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, laguna soo saaro faafinta rasmiga ee Dawladda

**Qodobka 52-aad: Hindise sharciyeedka la diiday**

Haddii Golaha Shacabka diido hindise sharciyeed, hindise haasi laguma soo celinkaro Golaha muddo 30 malmood laga bilaabo maalinta hindisaha la diiday, sida ku xusan Qod.68 (4) ee Dastuurka.

**Qodobka 53aad: Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada**

Kaydka sharciyada Dawladda iyo baafintooda waxaa mas'uul ka ah Xoghayeyaasha Labada Aqal iyo Garyaqaanka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka oo faafinta rasmiga ah ku samaynaya, sida ku cad Qodobka 84-aad ee Dastuurka.

**Qodobka 54-aad: Dhaqangelidda Sharciyada**

Sida ku cad Qodobka 85aad ee Dastuurka, hindise sharci qabyo ah wuxuu dhaqan-gelayaa kaddib marka uu maro habraaca sharci-dejinta, Madaxweynaha Jamhuuriyadduna saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga.

**Qodobka 55-aad: Durid Sharci**

1. Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada iyo dhaqangelintiisaba, si waafaqsan Qodobka 86 aad ee Dastuurka, waxaa lagu duri karaa oo keliya marka uu ka soo horjeedo Shareecada Islaamka iyo Dastuurka
2. Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada, si waafaqsan, sida ku xusan cutubka lixaad ee dastuurka iyo xeerka Golaha, waxaa duri kara:
   (a) Saddex meelood (1/3) xubnaha Golaha Golaha
   (b) Golaha Wasiirrada Federaalka;
   (c) Toban kun(10,000) iyo in ka badan oo cod bixiyayaal ah oo diiwangashan
3. Durid sharci ee waafaqsan faqaradda 1aad iyo labaad ee qodobkan, waxaa la horgeyn karaa go'anna ka gaarikarta Maxkamadda Dastuuriga ah oo keliya.

---

[25] F.G: Faqradda 5-aad ee qodobka 50-aad waa faqradi 6-aad ee qodobka 47-aad oo loo soo raray qodobkaan marki horane u qornaayd sidaan " Haddii dhowr xubnood isla soo bandhigeen soo jeedin wax-ka bedelid hindise sharciyeed, Guddoonka ayaa tilmaamyo Xubinta soo jeedin doonta wax-ka-bedelida noocaas " waxaa loo qoray sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

4. Haddii Maxkamadda Dastuurigu ay jebiso duriddii sharciga, kharajka ku baxay waxaa bixinaaya dhinacii hindisaha duridda Maxkammadda Dastuuriga hor-geeyay.

**CUTUBKA 8-AAD:**

**GUDDIYADA**

**Qodobka 56-aad: Xeerarka Guud**

1. Hannaanka sharciyeed ee Golaha Shacabka waxaa uu saameeyaa guddiyada si la mid ah sida uu Golaha Shacabka u saameeyo.
2. Golaha Shacabku waxaa uu dhisaa oo ogoolaanayaa guddiyo (ayna ku jirin madaxda guddiyada), isla markaana waxaa uu qeexaa waajibaadka shaqo ee guddiyadaas, kadib marka uu gudoomiyaha Golaha Shacabku soojeediyo asagoo la tashanaya ku xigeenadiisa.
3. Guddigu waxaa uu arrin khaas ah oo leh waqti cayiman aawadeed ugu soo darsan karaa xubnihiisa qof aan horey uga mid ahayn guddiga, kadib marka xubnaha guddigu arrintaas isla aqbalaan. Xubinta lagu soo daray guddiga waay ka qeyb gali kartaa fadhiyada guddiga lakiin malaha xuquuqda cod bixinta ee arimaha uu guddigu go,aanada ka gaarayo.
4. Marka ay jiraan duruufo, guddiyadu waxaa ay isla isticmaali karaan qalabka iyo adeegyada kale ee la heli karo.
5. Guddomiyaha Golaha Shacabku, asagoo la tashanaya ku xigeenadiisia, waxa uu magacaabaa guddiyo u xilsaaran in ay qabtaan howlo gaar ah, warbixintoodana u soo gudbiya Guddoonka Golaha Shacabka , si loo horgeeyo Golaha Shacabka. Haddii hal shaqo ay ka wada dhaxayso dhowr guddi, guddiga arrinka masuulka ka ah iyo guddiyada hawshu kala dhaxayso waa inaay isku waafaqaan waqti xaddidan oo ku haboon gudbinta aragtiyadooda. Haddii ayna gaarin waqti xaddidan waxaa waqtiga go,aaminaya Gudoomiyaha Golaha Shacabka, asaga Guddoonka sidaas ku wargalinaya.

**Qodobka 57-aad: Waajibaadka Shaqo ee Guddiyada Golaha Shacabka**

Waajibaadka Shaqo ee Guddiyada Golaha Shacabka, marka lagu daro shaqooyinka ayaga u khaaska ah ee xeer-hoosaadkani farayo, waxay ahaanayaan sida soo socota.

a) In ay fuliyaan shaqo kasta oo uu Golaha Shacabka u xilsaaro,
b) In ay baaraan, ka doodaan,talana ka soo bixiyaan sharciyada qabyada ah ee la hor keeno Golaha Shacabka
c) In ay keenaan sharci kasta oo qabyo ah ama qaraaro qabyo ah oo ku saabsan waxyabaha ay shaqadoodu tahay, marka laga reebo hindise sharciyeed la xiriira miisaaniyadda sanadlaha iyadoo ay isku raaceen ugu yaraan10 xubnood ee Guddiga
d) In ay Golaha Shacabka u soo jeediyaan sharciyo qabyo ah (hidiso sharciyeed) oo ay tahay in xukuumada loo faro in ay kafaalo qaado.
e) In ay talo siiyaan guddiga misaaniyada iyo Maaliyadda, lacagta iyo illaalinta hantida qaranka arimaha ku saabsan mudnaanta miisaniyadeed ee wasaaradaha ama hay'adaha kale ee shaqadooda hoos timaado.
f) In ay baaraan talana ka bixiyaan siyaasadaha saameynta ku leh wasaaradaha guddiyada shaqadu kala dhaxeyso.
g) In ay ka talo bixiyaan ama ay cadeeyaan arrimaha Golaha Shacabka u soo gudbiyo.
h) In ay keenaan doodo barlamaanku ka yeesho oo ah arrimaha faa'iidadu ugu jirto ummada.
i) In ay qiimeeyaan, kormeeraana habka loo qabto iyo habka loo hirgaliyo sharciyada iyo qorshayaasha xukuumadda iyo hay'adaha ama koox kasta oo ay sharci ahaan shaqo kala dhaxeyso.
j) In ay dib-u-eegis ku sameeyaan qorshaha kharashaadka waqtiga dhow, dhexe iyo kan fog-ba ee ha'yadda ama ha'yadaha loo xilsaaray.
k) In ay bilaabaan baaritaan la xiriira shaqada guddi kasta u xilsaaran yahay
l) In ay sameeyaan cilmi baaris ku saabsan shaqada guddi kasta u xilsaaranyahay
m) In ay sameeyaan dadaal kasta oo ay kula falgelayaan kuna kasbanayaan bulshada rayidka ah,

n) In ay Golaha Shacabka ku wargaliyaan shaqooyinkooda.

**Qodobka 58-aad: Guddoonka Guddiyada**

1. Guddi kasta ee Golaha Shacabka waa inuu yeeshaa Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeen iyo xoghayn oo ah hogaanka guddigaa.
2. Xubin kasta oo ka mid ah guddoonka guddiga waa in laga dhex doortaa xubnaha gudiga dhexdooda laguna doortaa cod aqlabiyad ah oo ka yimid xubnaha guddiga.
3. Gudoomiyaha guddiga ayaa saxiixaya go'aanada guddiga. Hadii Gudoomiyaha maqanyahay waxaa shaqadiisa qabanaya gudoomiye ku xigeenka, hadii labadooda maqanyihiin waxaa howshaoda qabanaya xoghayaha guddiga, hadii isana maqanyahay, Guddigu qof ayay iska dooranayaan oo sii wada howsha Guddiga. Waxaana la ogaysiinayaa Gudoomiyaha Guddiga[26]. ..
4. Haddi gudoomiyaha guddigaasi uu soo gudbiyo istiqaalo qoraal ah, haddii uu dhinto, haddii ay ku timaado xil gudasho la,aan joogto ah ama uu si joogto ah uga maqnaado kulammada gudiiga, guddigu waxaa uu arrinkaas ku wargalinayaa guddoomiyaha Golaha si ay u u doortaan gudoomiye cusub,
5. faqradda 4aad ee qodobkan, waxay sidoo kale saameeynasaa gudoomiye ku-xigeenka, iyo
6. Xoghaynta guddiga.

**Qodobka 59-aad: Kulammada Guddiyada**

1. Guddiyadu waa in ay si joogto ah u kulmaan ugu yaraan labo jeer bishiiba, waqtiyada lagu jiro kalfadhiyada Golaha Shacabka, waqtiyada kulammada waxaa goynaya guddomiya, ama waxaa tala ka soo jeedinaya golahashacabka;
2. Guddi walba xaq buu uu leeyahay in uu kulmo xitaa marka kalfadhiga Golaha ay xiranyihiin;

---

[26] F.G: faqrada 3-aad ee qodobka 58-aad oo marki hore u qornaayd sidaan " Gudoomiyaha guddiga ayaa saxiixaya go'aanada guddiga" waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

3. Guddi kulan kale ma yeelan karo (Kama garab furi karo kulan kale) ayada oo uu socdo kulan Golaha Shacabka, haddii uuna ka helin ogolaansho Guddoomiyaha Golaha Shacabka.
4. Marka uu helo codsi ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan saddex meelood meel (1/3) xubnaha guddiga, gudoomiyuhaha Guddiga waa inuu qabtaa kulanka mudo ku siman 10 (toban) maalmood gudahood oo maalmo shaqa ah, ayadoo xubnaha guddiga lagu wargalinayo jiritaanka kulankaa ugu yaraan 48 saacadood ka hor. Ujeedada laga leeyahay qodobkan awgeed, sababta loo qabanayo kulankaana waa in lagu cadeeyaa wargalinta.
5. Kadib marka uu gudoomiyaha guddigu amro, xoghayuhu waa inuu siiyaa xubin kasta ooka mid ah guddiga ogaysiin ku saabsan kulankaas ugu yaraan afartan iyo sideed (48) saacadood ka hor kulanka, ogaysiiskaasi waa inuu ku cad yahay ajendaha shirka, waqtiga iyo goobta lagu kulmayo.
6. Xaghayuhu waa inuu Guddomiya Shacabka shir walba ee Guddigu leeyahay qoraal ahaan ugu wargeliyo;.
7. Gudoomiyaha guddigu waa inuu siiyaa xubin kasta oo kamid ah gudiga wax alaale wixii qoraallo ah (documents) ee la xiriira ajendaha kulanka.
8. Markasta oo ajenda kamid ah ajendayaasha kulanka uu quseeyo wasaarad, waa in Gudoomiyaha guddigu xaqiijiyaa in wasaarada qodobkaan shaqada ku leh la gaarsiiyay ogaysiin ku saabsan kulanka guddiga ugu yaraan afartna iyo sided saacadood (48) ka hor, haddii ayna gudigu go’aansan si kale (sida inaan la ogeysiin wasiirka jiritankakulanka).

## Kulamada khaaska ah iyo kuwa guud

9. Shirarka guddiyadu waxay noqonayaan mabda’ ahaan kuwa u furan Dadweynaha marka laga reebo xilliyada uu guddigu:
   a) Ka doodayo arrimo qarsoodi ah oo taabanayo amniga dalka
   b) Ka doodayo faafaahin ku saabsan qandaraas ganacsi oo ay ku lug-leeyihiin hay’adaha Jamhuuriyada Soomaalia iyo cid seddexaad oo looga hadlayo arrimo qandaraas oo qarsoodi ah.

c) Diyaarinayo talo soo jeedin qabyo qoraal ama dhameystiran oo ay ka mid yihiin qoritaanka warbixinta muhiimka u ah Golaha

d) Uu sidaa go'aansado iyadoo lagu saleynayo codka aqlabiyadda xubnaha guddiga.

## Ajendaha (qodobada laga hadlayo)

1. Guddoomiyaha guddigu asagoo la tashanaya xubnaha guddiga waa inuu go'aamiyaa ajenda kulanka.
2. Gudoomiyuhu waa inuu qoraa Ajendaha kulanka asagoo tixraacaya qorshaha shaqo ee guddiga iyo kan Golaha Shacabka.
3. Gabagabada kulan kasta oo uu yeesho guddigu, waa in guddigu ka doodaa waxa uu ku saabsanyahay kulanka xiga ee guddigu yeelan doono, waana in ay diyaariyaan nuqulka ajendaha ee kulankaas.
4. Kadib marka uu gudoomiyuhu helo codsi ku aadan arrin ay tahay in laga doodo oo ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan saddex meelood meel (1/3), xubnaha guddiga, waa in uu gudoomiyuhu qodobkaa ku daro ajendaha.
5. Guddigu waxaa uu ku badali karaa ajendaha cod aqlabiyad ah.

## Soo xaadirista kulamada Guddiga

1. Xubinta oo aan fasax ka helin Guddoomiyaha Guddiga iyo Gudoomiyaha Golaha Shacabka uu ka maqnaado lix kulan oo isku xiga ama uuna kasoo qeyb galin kulamada guddiga oo dhan muddo ka badan sadex bilood waxaa xubintaa loo gudbinaya Guddiga Xeer Hoosaadka, maamuuska Anshaxa iyo Xasaanadda
2. Haddii ku xigeen ka gudoomiyaha gudiga iyo xog hayuhu ayagoo aan ogolaansho ka haysan gudoomiyaha Golaha Shacbka iyo gudoomiyaha guddiga ay ka maqanaadaan afar kulan oo isku xiga ama kulamada gudigu yeesho oo dhan, waqti ka badan labo biloood waxaa si dhaqso leh loogu gudbinayaa Guddiga Xeer Hoosaadka, maamuuska Anshaxa iyo Xasaanadda .
3. Haddii gudoomiyaha guddiga asagoo aan ka haysan ogolaansho gudoomiyaha Golaha Shacbka ka uu ka maqnaado afar kulan oo isku xiga ama kulamada uu yeesho guddigu waqti ka badan laba bilood waxuu weynayaa xilkii guddoomiyenimada.
4. Xoghayaha guddiga waxaa laga doonayaa inuu ku wargaliyo guddiga marka ay jiraan ama ay muuqdaan arrimaha ku xusan (15),(16) iyo (17) ee qodobkani.

**Qodobka 60-aad:  Habka kulamada Guddiyada**

1. Kulamada guddiyada waa inuu guddoomiyo guddoomiyaha guddigu.
2. Haddii uu maqanyahay gudoomiyaha guddigu, ku xigeenka guddoomiyaha ayaa qabanaya shaqadii gudoomiyaha.
3. Gudoomiyaha waa inuu maamulaa doodaha guddiga, asagoo xaqiiqsanaya/aqoonsanaya qof kasta oo hadlaya, xaqiijinayana in waxyaabaha laga doodayo ay waafaqsan yihiin sharciyo iyo xeerar jira.
4. Gudoomiyuhu waa inuu xaqiiqsadaa qofka uu yahay ka hor inta aaney hadlin xubnaha guddigu.
5. Gudoomiyuhu waa inuu u ogolaado xubnaha in ay u hadlaan sida ay ugu kala horeeyaan codsiga ah in ay hadlaan.
6. Haddii nidaamka kulanka aan la ilaalin, gudoomiyuhu waxaa uu joojin karaa kulanka.
7. Xubnaha Guddiga waxay iska-dhex-dooranyaan Gudoomiye haddii Gudoomiyaha iyo Ku-Xigeenkiisa ka maqnaadaan shirka Guddiga .
8. Karraaniga Guddiga ayaa ka mas'uul ah qaadista minityada (qoraallada) kulanka, galeynta/xifidida qoraalada guddiga, helidda iyo ka qaadista qoraalada xafiiska guddiga, fududeynta xiriirka guddiga iyo xukuumadda. Guud ahaana xogyaha ayaa la soconaya hirgalinta go'aamada guddigu gaaro.
9. Xogheynta Guddiga ayaa u xilsaaran kormeerka karraaniga  (Clerk) ee Guddiga.

## Kooramka/Guntanka (tirada ugu yar ee kulan ku ansixi karo)

10. Inta badan ee xubnaha Guddiga ayaa ah kooramka.
11. Waxaa loo baahan yahay in uu kooramku dhan yahay marka gudigu go'aan ka gaarayo cod, Qaraar, ama go'aan.

## Codeynta

12. Go'aanada guddiga waxaa la gaaraa ayadoo la raacayo ansixinta mooshin ku yimaada cod aqlabiyad ah oo ay ku codeeyaan inta badan xubnaha jooga oo codeynaya.
13. Haddii uu cod ku nodqo bar-bar dhac halka uu gudoomiyaha codkiisu raaco ayaa la ansixinayaa.

14. Gabagabada doodda ee arrin laga doodi karo, haddii talo lasoo jeediyo gudoomiyaha ayaa u aqrinaya gudiga qodobkaas lasoo jeediyay waxaa uuna weydiinayaa in ay aqbalaan in laga doodo iyo in kale.
15. Haddii uu jiro khilaaf cad oo ku saabsan soo jeedin ka-doodis u baahan la keenay oo u dhexeeya guddiga, gudoomiyuhu waxaa uu ugu baaqayaa gudiga inay cod u qaadaan arrinkaas.
16. Xubnaha guddigu waxaa ay u codeynayaan ayagoo taagaya gacanta, tirade codadkaas dhinac kastana waa in lagu qoraa ama sheegaa minit ka kulanka guddiga.
17. Xubin ka mid ah guddiga waxa ay codsan kartaa cod bixinta oo qoran/diwaangashan, waa haddii codsigaasu yimaado ka hor intii aan loo guda gelin codeynta.
18. Haddii xubin kamid ah guddiga ay codsato codeynta la qoro, xoghayaha guddiga waa inuu yeeriyaa ama aqriyaa magacyada xubnaha sida ay ugu kala horeeyaan xaraf ahaan, xubin kasta waxaa uu ku jawaabayaa "haa" ama "maya", natiijada codkana waxaa ku dhawaaqa xoghayaha guddiga, gudoomiyaha guddiga waxaa uu cadeeyaa in soo jeedintaas (motion kaas) la ansixiyey ama aqbalay iyo in la diidey, natiijada iyo magacayada xubnaha oggolaaday iyo kuwa diiddayba waxaa lagu sheegaa ama lagu qoraa minitka kulanka.
19. Xoghayuhu waa inuu xaqiijiyaa in go'aamada guddigga loo diro Guddoonka Golaha Shacabka.

## Dhageysiga dadweynaha

1. Si loo helo warbixino la xiriira arrinta guddigu ka doodayo, guddigu waxaa uu qaban karaa kulamo furan oo ay dhagaysanayaan khabiiro, wakiillo ka socda ururrada bulshada rayid ka ah, iyo shaqsiyaad kale ee keeni kara warbixino muhiim ah.
2. Marka shaqo loo xilsaaro guddiga si uu uga doodo, guddiga arrintaa masuulka ka ahi waa inuu ogolaadaa inuu qabto kulan dadweynuhu dhagaysanayaan haddii afarmeelood oo meel (1/4) xubnaha gudiga ay sidaa dalbadaan.
3. Haddii dhagaysiga dadweynaha ay dalbadaan xubno laga tiro badan yahay oo guddiga kamidah ayadoo la tixraacayo faqrada (21) ee kor ku xussan, dadka ay magacaabeen kooxdaas yari waa in la dhagaysto.

**Qodobka 61-aad: Dib u eegista iyo ka warbixinta qoraalada sharciyada qabyada ah**

Marka sharci qabyo ah Golaha Shacabku usoo gudbiyo guddi, guddigaasi waa inuu u dib u eegis ku sameeyaa sharcigaa qabyada ah, sida soo socota:

1. Guddigu waa inuu casuumaa cidda soo gudbisay sharcigaa qabyada ah si uu ugu sharraxo sharcigaa guddiga, uuna uga jawaabo su'aalaha xubnaha guddiga ay ka qabaan sharcigaa qabyada ah.
2. Haddii cidda keentay sharciga qabyada ah aaney ahayn wasaarad, guddigu waa inuu marti qaadaa wasiirka sharcigaa shaqada ku leh ama ha'yadaha ay arrintu khuseyso si ay uga dhiibtaan fikirkoodda ku aaddan sharcigaa qabyada ah.
3. Guddigu waxaa uu yeelan karaa kulamo uu dhagaysigooda ka soo qayb galiyo dadweyne isugu jira khubaro, ururada dadweynaha, dadka wakiil ah bulshada rayidka ah iyo shakhsiyaadkii kale ee keeni kara warbixino la xiriira sharcigaa qabyada ah.
4. Kadib marka uu dhagaysto xogta saraakiisha Dawaladda iyo marqaatiyaasha kale guddigu waa inuu u dib u eegis ugu sameyaa sharcigaas qabyada ah qodob qodob.
5. Marka guddigu uu gabagabeeyo dib u eegistiisa qodob qodobka ah uuna go'aamiyo isbeddello lagu samaynayo sharciga qabyada ah ee loo soo gudbiyay, waa inuu wargeliyo Wasiirka shaqada ku leh ama ha'yadaha ay arrintu khuseyso uuna raadiyo fikirkooda ku aadan isbadallada lagu sameeyey sharciga qabayada ah.
6. Ka dib marka guddigu gabagabeeyo shaqada ku xussan faqrada kore(1-5), waxaa guddigu war bixintaa oo qoran u gudbinayaa Golaha Shacabka a ayadoo ay la socoto wixii la badalay ama ayna la socon.warbixintaa waxaa xoojiya hadal ahaan Golaha Shacabka dhexdiisa guddoomiyaha guddiga ama xubin kamid ah guddiga oo uu asagu u xilsaarto arrintaa.
7. Warbixinta ku saabsan sharciga qabyada ah waa in lagu soo bandhigo isbadallo cayiman oo sabab loo yeelayo kuwaasoo Golaha Shacabka uu go'aan uga gaaro kulankiisa xilliga warbixinta.
8. Guddigu waxaa uu xaq u leeyahay inuu u soo jeediyo Golaha Shacabka diidmada sharci qabyo ah asagoo soo bandhigaya cadaymo la xiriira sababta uu u diidayo sharcigaa.

9. Xoghayaha guddiga waa inuu ku wargaliyaa wasiirka shaqada ku leh ama ha'ayadaha arrintu khuseyso waqtiga sharciga qabyada ah ee Golaha Shacabka u soo gudbiyey laga doodayo.

**Qodobka 62-aad: Xiriirka guddiyada iyo xukuumadda**

1. Wada shaqaynta ka dhaxeysa guddiyada baarlamaanka iyo xukuumaddu waxaa ay ku salaysan tahay mabda'a ah is-texgalin iyo isla xisaabtan.
2. Waa In ay jiraan kulamo joogto ah oo uu la yeesho guddigu wasiirrada ugu yaraan hal mar saddexdii biloodba, si wasiirradu guddiga ula socodsiiyaan howsha wasaaradaha.

## Barnaamijyada Shaqo ee wasaaradaha

1. Bilowga sannad kasta guddi kasti waxaa uu ka doonayaa wasaarada shaqadu kala dhexeyso ama ha'ayadaha kale, in ay usoo gudbiso guddiga barnaamijyada shaqo ee sannadkaa, ajendaha sharciyeed ee wasiirradu soo bandhigaan, iyo ujeedooyinka aytahay in lagu guuleysto sannadkaa.
2. Guddi kastaa waa inuu kormeeraa lana socdaa hirgalinta barnaamijyada shaqo ee Wasaaradu soo gudbisay

## Xog raadinta Guddiga

1. Iyadoo Sharciga la raacayo wuxuu Guddiga weydiisan karaa Xukuumadda, Hay'adaha ama dhinac kale, in ay siiyaan guddiga tafaasiil ama warbixin ama qoraal guddigu uu ugu baahan yahay inuu ku guto shaqadiisa.
2. Ayadoo aana la khilaafeyn farqada sare ku xussan ee qodobkani, ugu yaraan saddex meelood meel (1/3) xubnaha guddigu waxaa ay qoraal ku codsan karaan in xukuumaddu, hay'ad ama dhina kale ay siiyaan guddiga warbixin iyo qoraallo la xiriira barnaamijyadda shaqo ee guddi. Guddoomiyaha guddigu waa in uu si dhaqso ah uu ugu gudbiyaa madaxa wasaaradda, hay'adda ama qolada kale uu ku shaqada leh codsiga uu helay oo ay ku saxiixan yihiin saddex meelood meel (1/3) xubnaha guddigu.
3. Xukuumadda, hay'adda, iyo laamaha kale ee ku shaqada leh waa in ay si dhaqsa ah ugu gudbiyaan guddiga warbixinta iyo qoraalada uu ka codsaday, haddii ayna tani ka horimaanayn sharciga.

## Baaritaannada uu sameeyo guddigu

1. Si loo helo xog dheeraad ah waqtiga guddigu baarista ku wado xukuumadda, guddigu waxaa uu qaban qaabin karaa kulan ay dhagaysanayaan dadweynaha (kulan furan),waxaa uuna ku marti galin karaa khubaro iyo shakhsiyaad kale oo keeni kara xog wax kuool ah. Ku dhawaaqista kulanka dhageeysiga dadweynaha ah iyo arrimaha ay tahay in warbixintooda la kulmiyo waxaa lagu baahin karaa warbaahinta, guddigu waxaa uu ka codsan karaa shaqsiyaad ka lagu marti galiyey kulanka furan in ay ku keenaan fikradahooda hab qoraal ah.

## Warbixinta Guddiga ee Arrimaha la baaray

1. Dhamaan warbixinnada waa in ay ku cadyihiin awoodda lagu samaynayo baarista.
2. Dhamaan warbixinnada waa inay ku cad yihiin magacyada xubnaha gudiga ee ka qeybqaatay warbixintaas.
3. Warbixintu waa in ay cadayso arrinka ama arrimaha laga shaqeeyey iyo xogaha uu gudigu helay, waxaa sidoo kale warbixintu leedahay tixraaca qeybaha ku haboon ee waxyaabaha la soo gudbiyey ee guddigu ku helay hab qoraal ah iyo hab hadal ahba.
4. Qoraalka warbixinta waa in lagu daraa talo soo jeedinta guddiga ee arrinta la daraaseeyey oo taxan.
5. Warbixintu waa in ay leedahay lifaaq ay ku taxan/qoran yihiin goobjoogayaasha la dhagaystay, iyo warbixinnada la soo gudbiyey intii ay daraasaddu socotay, marka uu codsado xubin ka mid ah Golaha Shacabka.
6. Dhammaan Dukumentiyada la xiriira warbixinta Guddiga waa in la xareeyaa uuna heli karaa Xildhibaan kasta oo soo codsada.
7. Haddii guddigu rabo inuu ka codsado Xukuumadda in ay jawaab ka bixiso warbixnta, gaar ahaan tan la xirrirta talo soo jeedinta guddiga, codsigaa qoraalkiisa waa in lagu qoraa warbixinta ka hor saxiixa gudoomiyaha.
8. Xukuumaddu waa in jawaab celin qoraal ah u gudbisaa Guddiyada muddo aan ka badneen lixdan (60) malmood ka dib markii warbixinta la gudoomay.
9. Golaha Shacabka wuxuu u yeeri karaa Ra'iisul Wasaaraha, Xubnaha Golaha Wasiirada iyo Gudoomiyayaasha Guddiyada Madax-Banaan iyo Xafiisyada kale:

**Qodobka 63-aad: Guddi Hoosaadyada**

1. Guddigu waa inuu abuurtaa guddi-hoosaadyo, marka uu u arko in ay tahay muhiim, si ay howshu ugu fududaato.
2. Guddi-hoosaadku waa inuu helo awood buuxda ayadoo la eegayo waajibaadka uu faray guddigu.
3. Xubnaha Guddi-hoosaadku waa xubno ka mida Guddiga caadiga ah.
4. Iyadoo la tixraacayo howl khaas ah ee guddi-hoosaadku leeyahay, guddigu waxaa uu u caddayn karaa taariikhda ay tahay in guddi- hoosaadku uu kusoo celiyo warbixintiisa.
5. Marka guddi-hoosaad loo xilsaaro inuu arrin cayiman daraaseeyo, guddi-hoosaadkaan jiritaankiisu waxaa uu ku egyahay kadib, marka uu guddiga u keeno warbixinttisa ugu danbeysa.
6. Marka guddigu ka helo guddi-hoosaadka warbxinta ugu danmbeysa, guddigu waa inuu darsaa, ansixiyaana warbxiintaa kama-danbeysta ah, isla mar ahaantaana waa in guddomiyaha guddigu warbixinta kama-danbeysta ah u gudbiyaa Golaha Shacabka. Guddi-hoosaadyadu awood uma laha in ay toos ugu gudbiyaan Golaha Shacabka warbixintooda.
7. Guddi-hoosaadku kama garab furi karo kulan ayadoo uu socdo kulankii guddiga.

**Qodobka 64-aad: Qorsheyaasha Shaqo iyo Qoondeynta Miisaaniyadda Guddiga**

1. Guddoomiyuhu asaga oo la tashanaya xubnaha kale ee guddiga waa inuu diyaariyo bilowga sanad kasta ugu danbeyn bisha sadexaad kowdeeda qorshaha shaqo ee Guddiga, iyo howlaha guddiga, tasoo ay ka mid noqon karto abuurista guddihoosaadyada, qorshahaa shaqada waa inuu ansixiyaa guddigu.
2. Guddigu waa inuu qiimeeyaa qorshaha shaqo ee wasaaradda shaqadu kala dhexeyso seddexdii biloodba mar, haddii ay muhiim noqotana wax bey ka badali karaan qorshahooda.
3. Gudigu waa inuu diyaariyaa, ansixiyaana sanad qorshe lagula soconayo si loo maareeyo in xukuumadda Soomaaliya ama wasaaradda arrinta shaqada ku leh ay hirgaliso sharciyada, oo ay ku jiraan la socoshada dhamaan howlaha wasaaradda arrintaa shaqada ku leh, taasoo qeyb ka ah qorshaha shaqo ee guddiga.

4. Guddiyada waa in ay helaan adeegyada khubarada, xirfadlayaasha, shaqaalaha farsamada iyo kaaliyeyaasha xafiisyada, hadba sidii uu guddigu u arko in ay tahay muhiim, hadba inta ay awood u siinayso Miisaaniyadda uu u ansixiyey Golaha Shacabku.
5. Guddiyada waa in awood loo siiyo in ay u safraan meel ka baxsan xarunta Golaha Shacabka, si ay u soo dhagaystaan caddaymo, u sameeyaan latashiyo ama ay booqdaan goobo la xiriira baaristooda.
6. Xoghayaha guddiga, waxaa uu u xilsaaran yahay diyaarinta dhamaan safarrada guddiga sida uu ugu sheego gudoomiyaha guddigu asagoo matalaya guddiga.
7. Gudoomiyaha Guddi kasta, asagoo la tashanaya xubnaha kale ee guddiga, waa inuu diyaariyaa Miisaaniyadda sanadka soo socda oo ku saleysan qorshahooda shaqo,waana inuu u soo gudbiyaa xafiiska Guddiga Joogtada Golaha Shacabka si loo ansixiyo. Guddigu waa inuu ansixiyo miisaaniyadiisa ugu danbeyn bisha sedexaad kowdeeda.
8. Miisaniyadda waa in ay ku jiraan, aanayse ku xadidnaan:-

a) Kharashka helida adeegyada khubarada, xirfadlayaasha, shaqaalaha farsamada iyo kaaliyayaasha xafiisyada, hadba sida loo arko in ay muhiim u yihiin,
b) Kharashka safarrada xubnaha guddiga ama xubanaha shaqaalaha ee la xiriira shaqada guddigan sida sharcigu u oggolyahay, kharashyadaa waxaa kamid ah ,kan raacista gaadidka,cuntada, gunno maalmeedka, hoyga xubnaha, kirada qolalka shirarka, adeegayada tarjumaadda, iyo kharashaadka kale sida saadka, dirista dhambaallada iyo waraaqaha, iibsashada qoraallada iyo qalabka kombuyuutarrada(IT), iyo adeega cabitaanka/qaboojiyeyaasha.

9. Kharashaadka guddigu waa In aysan ka hor imaan xadeynta cayiman ama sharciyada.
10. Codsiga ogolaanshaha safarka waa in hab qoraal ah loogu soo gudbiyaa Xafiiska isagoo caddeynaya:-
    a) Ujeedada safarka
    b) Taariikhda la safrayo
    c) meelaha loo safrayo
    d) Magacyada xubnaha la doonayo in loo ogolaado safarka.
    e) Qiimaha uu ku kacayo safarku.

11. Guddigu waa inuu diyaariyaa, Golaha Shacabka-na u gudbiyaa warbixin qoran oo ku saabsan safar kasta oo guddigu galo ee ku xusan qodobkan. Warbixintu waa in ay ku jirto faahfaahinta safarka, kharashaadka, howlaha, warbixinada la helay iyo go aanada lagu gaaray safarka.
12. Tixgalinta sharciyada qabyada ah waa in ay lahaadaan mudnaanta koowaad ee guddiyada oo dhan, waana in ay ka hormaraan daraasadaha iyo baaritaanada kale oo dhan.

**Qodobka 65-aad: Shaqaalaha Guddiyada**

1. Golaha Shacabka waa inuu siiyaa guddiyada shaqaale maamul iyo mid farsamoba.
2. Marka guddiga la siiyo shaqaale taageera, xoghayaha gudiga ayaa kormeeraya shaqaalalaha maamulka ee guddiga.

**Qodobka 66-aad: Qoraallada guddiga**

1. Xeerarka khuseeya qoraallada Golaha Shacabka, marka lagu sameeyo is-beddello (adjustment) laga maarmi waayo, waxay saameyn ku yeelanayaan qoraalada Guddiyada.
2. Hadal qoraalka shirarka (Minutes) Guddiyada waa in loo qoraa hab la mida kuwa Golaha Shacabka. Waxaa u sii dheer arrimaha hoos ku xusan:
    a) Haddii shirka uu ahaa mid furan ama mid xiran
    b) Magacyada shaqaalaha goob-joog ka ahaa
    c) Magacyada marqaatiyaalka, masu'uliyadooda iyo hay'adaha ay ka kala socdaan, haddii ay jiraan.
3. Hadal qoraalka waa in ay ku saxiixan yihiin Xoghayaha iyo xogheynta guddiga
4. Warbixinnada Guddiga ee loo gudbinayo Golaha Shacabka waxay noqon kuwa kooban oo hal bog ah, waana ay ka badanaan karaan, markasta waa inay daabacayihiin mid walbina iskuna dheggantahay iyada oo gaarkeed ah;
5. Hadal qoraalka shirarka guddiyada oo maqal iyo muqaal ah waa la sameyn karaa haddii sidaas Guddigu go'aansado

**Qodobka 67-aad: Guddiyada Golaha Shacabka**

1. **Guddiga Joogatada ee Golaha**

   Xubnaha Guddigaan waxay ka kooban yihiin:

   a) Guddomiyaha Golaha iyo labadiisa ku-xigeen

   b) Habdhooraha iyo labadiisa ku-xigeen

   c) Guddomiyayaasha guddiyada Golaha

2. **Guddiga Xeer Hoosaadka, Anshaxa , Xasaanadda iyo Daryeelka Xildhibaanada**

   Arrimaha hoos imaanaya guddigan waxaa ka mid ah:

   a) Guddigan waa In ay ku jiraan ugu yaraan labo(2) qareen

   b) Lixdan (60) cisho gudahood xilliga la dhiso guddigaan ka dib ee lagu jiro kal-fadhiga kowaad, waqti waa in loo qoondeeyo tixgalinta xeer hoosaadka sida uu guddigan soo jeediyo.

   c) Sodon (30) cisho gudahood ee bilawga kal-fadhi kasta ee golaha shacabka, guddigan wuxuu ka doodayaa hindisaha wax ka bedel ee xeerka wuxuuna u gudbinayaa talo soo jeedintiisa Golaha Shacabka si loo ansaxiyo;

   d) Guddigan wuxuu tixgalinayaa arrimaha la xariira xasaanadda xubnaha wixii talo soo jeedin ahna u gudbiyaa Golaha

   e) Guddigan wuxuu talo bixin ka jeediyaa arrimaha la xariira luminta xubinnimada ee Golaha Shacabka sida ku cad qodobka 59aad ee Dastuurka ku meel gaarka.

   f) Guddigan wuxuu talo bixin ka jeediyaa arrimaha la xariira tallabooyinka anshax marin ee laga qaadayo xubin ka tirsan Golaha Shacabka sababo ay kamid yihiin anshax xumo ama ku xadgudubka Xeer Hoosaadka Golaha.

   g) Guddigan wuxuu soo jeediyaa tallaabooyinka maamul ee lagu xoojinayo hab-dhaqanka iyo anshaxa xubnaha

3. **Guddiga La Socodka  Dib-u-eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka**

   iyadoo la tixgalinayo sida ku cad qodobka 133 ee dastuurka kumeelgaarka ah, guddiga La Socodku wuxuu:

a) Kormeerayaa, farayaa, ansaxinayaana hawlaha guddiga dib-u-eegista iyo dhaqangalinta Dastuurka iyo guud ahaanba ku dhaqanka dastuurka.

b) Xilliyada qaarkood fari karaa guddiga dib-u-eegista iyo dhaqangalinta dastuurka mashruuc qoraal sharci iyadoo lagu saleynayo baahida dastuurka kumeel gaarka ah.

c) Dib-u-eegayaa qabyo qoraalada wax ka bedelka dastuurka ama hindise sharciyeedyada iyo warbixinadda ku lifaaqan ee ka timid guddiga dib-u-eegista iyo dhaqan galinta dastuurka.

d) Ogeysiiyaa dadweynaha wixii soo jeedin ah.

e) Intii suurtogal ah, sugayaa in ay jiraan fursado ku filan ka qeyb-galkka dooda daweynaha.

f) La tashanayaa xubnaha ka socda dadweynaha.

g) Hubinyaa in xubnaha ka socda dadweynaha ay haystaan fursado ku filan oo ay kusoo bandhigi karaan fikirkooda iyo aaraadooda **guddiga isku-dhafka ah**.

h) La hadlayaa baarlamaanka maamul-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka islamarkaana ku biiriyo fikirka qoraallada ka yimaado xubnaha maamul-goboleedyada federaalka ka midka ah talo soo jeedinta wax ka bedel haddii ay arrinta khuseyso danaha maamul-goboleedka xubinta ka ah federaalka.

i) Kormeerayaa dhaqan gelinta mabaadii'da Federaalka Soomaaliya.

j) Warbixin siinayaa golaha ugu yaraan hal jeer sedexdii biloodba.

k) Qabanayaa wixii hawl kale ah ee dastuurka kumeelgaarka ah iyo sharciga federaalka ah farayo

**4. Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arimaha Diinta, wuxuuna yeelanayaa Guddi-hoosaadyada soo socda:**

**A. Guddi-Hoosaadka Arimaha Garsoorka**

**B. Guddi-Hoosaadka Arimaha Diinta & Awqaafta**

A. Guddi-Hoosaadka Arimaha Garsoorka wuxuu u xilsaaran yahay:

i. Hubinta madaxbannanida Garsoorka,

ii. Ka baaraandegista shuruucda la xiriirta hayadaha Garsoorka & garsoorayaasha
iii. La socodka cabashooyinka bulshada ee la xiriira arimaha garsoorka iyo gardoonka
iv. La socdka arrimaha Xabsiyada iyo Maamulkooda

B. Guddi-Hoosaadka Arimaha Diinta & Awqaafta wuxuu u xilsaaran yahay:
   i. Ka talabixinta iyo u kuur-gelidda arrimaha la xariira faafinta diinta Islaamka.
   ii. Ka tala-bixinta hawlaha la xiriira Maamulka masaajidda, Xajka & Cimarada iyo hawlaha kheyriga ah.

**5. Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada iyo Amniga: wuxuuna yeelanayaa Guddi-hoosaadyada soo socda:**

**A. Guddi-Hoosaadka Arrimaha Gudaha iyo Maamullada Gobollada**

**B. Guddi-Hoosaadka Arrimaha Amniga**

A. Guddi-hoosaadka arrimaha gudaha iyo maamullada gobollada wuxuu u xilsaaran yahay:
   i. Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda
   ii. Katala bixinta iyo la socodka arrimaha maamul goboleedyada si waafaqsan dastuurka
   iii. Katala bixinta xiriir wanaaga hoggaanka dhaqameedyada iyo maamuladda gobolada iyo degmooyinka

**B.** Guddiga-Hoosaadka Arrimaha Amniga wuxuu u xilsaaran yahay:
   i. La socodka arrimaha Ciidanka Boliiska iyo Hay' adaha amniga
   ii. La socodka arrimaha Socdaalka iyo jinsiyidda
   iii. La socodka Qorshaha qaran ee amniga iyo xasilinta dalka

**6. Guddiga Xaqiiqa Raadinta, Dib-u-Heshiisiinta , iyo Hanti isu-celinta:**

Wuxuu u xilsaaran yahay:

a) Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda

b) Xaqiiqa raadinta ku saabsan xadgudbyada ka dhanka ah xuquuqda bani'aadamka;

c) Katala bixinta Arrimaha Caddaalada xilliga kala guurka ah. (Transitional Justice) iyo tacaddiyaada la geystay iska raaligelintooda

d) Wuxuu la shaqeynayaa Guddiga Madaxa bannaan ee Runta, Xaqiiqo raadinta iyo Dib u heshiisiinta ee ku xusan Dastuurka

e) Wuxuu daraasad ku soo sameynayaa talana ka soo bixinayaa dhulka iyo hantida qaranka  la haysto iyo midda gaarka ah ee sharci darrada lagu kala haysto

7. **Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalmiga iyo La-xisaabtanka Hay'adaha Dawladda,  wuxuuna yeelanayaa Guddi-hoosaadyada soo socda:**

   A. Guddi Hoosaadka Miisaaniyadda & Maaliyadda
   B. Guddi Hoosaadka Qorsheynta iyo Tira-koobka
   C. Guddi Hoosaadka La-xisaabtanka Dhammaan Hayadaha Dawladda

      A. Guddi Hoosaadka Miisaaniyadda & Maaliyadda wuxuu qabanayaa:

         i. Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda
         ii. Wuxuu ka baaraan dagaa soo jeedinta xukuumadda ee ku aadan ku talagalka Miisaaniyadda sanad kasta.
         iii. Wuxuu tixgaliyaa hindiso sharciyeedyada uu Golaha u xilsaaro ee arimaha Misaaniyadda iyo Maaliyadda;
         iv. Wuxuu dib u eegaa siyaasada lacageed ee dawlada federaalka.
         v. Wuxuu ka baaraan dagaa kharash-miisaaniyadeedka hay'adaha iyo wakaaladaha heerka Federaalka.
         vi. U kuurgalka siyaasadda canshuuraha iyo dakhliga.

      B. Guddi Hoosaadka Qorsheeynta & Tirakoobka

         i. Wuxuu talo ka bixiyaa tallaabooyinka maamul ee sare loogu qaadayo siyaasadda dhaqaale ee Dowladda.

ii. Wuxuu talo ka bixiyaa, una kuurgeleiyaa tirakoobka guud ee dhaqan-dhaqaale iyo bulshada

iii. Wuxuu tixgaliyaa hindiso sharciyeedyada ee la xiriira arimaha qorsheynta & tirakoobka

C. Guddi Hoosaadka La-xisaabtanka Dhammaan Hay'adaha Dawladda

i. Wuxuu ka baaraan dagaa warbixinta hanti-dhawrka guud soona jeediyaa tallaabooyinka ku haboon Golaha ee ku aadan hab-raaca Maamul wanaagga ee dawladda.

ii. Wuxuu tixgaliyaa hindiso sharciyeedyada ee la xiriira arimaha la-xisaabtanka hayadaha Dawladda

**8. Guddiga Arrimaha Dibedda**

Arrimaha hoos imaanaya waajibaadka guddigan waxaa ka mid ah:

a) Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda
b) Xariirka caalamiga ah
c) Heshiisyada iyo Axdiyada caalamiga ah
d) Arrimha Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha
e) Qurbo joogta
f) Qaxootiga

**9. Guddiga Difaaca**

**Wuxuuna leeyahay guddi-hoosaadyada soo socda:**

**A. Guddi-hoosaadka Gaashandhigga iyo Arrimaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed**

**B. Guddi-hoosaadka Hub-ka dhigista iyo Dhaqan celinta Maleeshiyaadka**

Arrimaha, hay'adaha iyo wakaaladaha hoos imaanayo awoodaha guddigaan waxaa ka mid ah:

a) Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda
b) Ciidanka Xooga Dalka
c) Hub ka dhigista

d) Dhaqan celinta maleeshiyooyinka

e) Illaalinta xuduuda dalka

f) La dagaalanka burcad badeedka

Guddigan wuxuu la shaqeynayaa guddiga madaxa banaan ee amniga Qaranka iyo xafiiska gardoonka sida ku xusan dastuurka kumeel gaarka ah iyo xeerka federaalka.

**10. Guddiga Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Arrimaha Bani'aadanimada**

Wuxuuna ka kooban yahay:

A. Guddi hoosaadka Xuquuqul Insaanka

B. Guddi hoosaadka Haweenka iyo Arrimaha Qoyska

C. Guddi hoosaadka Arimaha Bani'aadanimadda iyo barakacayaasha (IDPs)

Hawlaha ay qabanyaan waa:

a) Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda

b) Xuquuqul insaanka

c) Dadka naafada/curyaanka ah

d) Ilaalinta xuquuqda dhalaanka

e) Arrimaha jinsiga (lab/dheddig)

f) Dadka gudaha ku barakacay

g) Gargaarka bani'aadanimo ooy ka mid yihiin sida loo maareynayo abaaraha iyo masiibooyinkakale.

Guddigan wuxuu la shaqeynayaa guddiga madaxa banaan ee xuquuqul insaanka iyo xafiiska gardoonka sida ku xusan Dastuurka kumeel gaarka ah iyo xeerka federaalka.

**11. Guddiga Horumarinta Adeega Bulshada**

**Wuxuuna yeelanayaa:**

A. Guddi-Hoosaadka Caafimaadka;

B. Guddi-Hoosaadka Waxbarashada;

C. Guddi-Hoosaadka Shaqada;

D. Guddi-Hoosaadka Dhaliyarada iyo Isbortiska

Arrimaha hoos imaanaya guddi-hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

a) Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda
b) Caafimaadka bulshada
c) Siyaasada caafimaadka qaran
d) Daryeeelka caafimaad iyo caymiska
e) Waxbarashada hoose iyo tan sare
f) Tababarka xirfadaha iyo waxbarashada aan rasmiga aheyn
g) Sayniska & Arrimaha Tiknoolajiyada
h) Arrimaha shaqada
i) Ururada Bulshada
j) Arrimaha Dhalinyarada
k) Arrimaha Isboortiga

**12. Guddiga Kheyraadka Dabiicigaa Iyo Bii'ada ,**

wuxuuna yeelanayaa:

A. Guddi-Hoosaadka Macdanta, Biyaha iyo Shidaalka

**B. Guddi-Hoosaadka Bii'ada iyo Ilaalinta Duurjoogta**

Arrimaha hoos imaanaya guddi hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

a) Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda
b) Ilaalinta bii'ada; bad, berri iyo hawada sare
c) Ilaailnta Duurjoogta
d) Shidaalka
e) Kheyraadka macdanta & Biyaha

**13. Guddiga Beeraha , Horumarinta Reer-miyiga , Xoolaha iyo Khayraadka Badda**

wuxuuna yeelanayaa:

A. Guddi-Hoosaadka Beeraha & Siyaasadda Dhulka

B. Guddi-Hoosaadka Horumarinta Reer-miyiga, Xannanada Xoolaha, Dhirta & Daaqa

C. Guddi-Hoosaadka Kheeraadka Badda

Arrimaha hoos imaanaya guddi hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

a. Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda
b. Dalagga
c. Dhul Beereedka
d. Waraabka
e. Kalluunka iyo kheyraadka badda
f. Hormarinta Reer miyiga
g. Xannanada Xoolaha

**14. Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostadda iyo Isgaarsiinta,**

**Wuxuuna yeelanayaa Guddi Hoosaadyada soo socda:**

**A. Guddi-Hoosaadka Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka**

**B. Guddi-Hoosaadka Boostadda iyo Isgaarsiinta**

Arrimaha hoos imaanaya guddi hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

a) Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda
b) Warfaafinta iyo wacyigalinta
c) Siyaasada warbaahinta
d) Warbaahinta qaranka (SNTV, Radio Mogadishu)
e) Xuquuqda daabacaada iyo xuquuqda lahaansho fikir

Guddigan wuxuu la shaqeynayaa guddiga madaxa banaan ee xuquuqul insaanka iyo xafiiska Gardoonka sida ku xusan Dastuurka iyo Xeerarka Federaalka

**15. Guddiga Waddooyinka, Dekedaha, Garoomada, Tamarta iyo Gadiidka**

Wuxuu leeyahay:

A. Guddi Hoosaadka Waddooyinka iyo Gaadiidka Dhulka
B. Guddi Hoosaadka Dekedaha & Gaadiika Badda
C. Guddi Hoosaadka Garoomada & Gaadiidka Cirka
D. Guddi Hoosaadka Tamarta

Arrimaha hoos imaanaya guddi hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

a) Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda
b) Dhisida iyo ilaalinta wadooyinka,
c) Dhismayasha Dowlada,
d) Dhismaha Gegada Diyaaradaha iyoDekadaha
e) Gaadiidka noocyadiisa kala duwan
f) Tamarta

**16. Guddiga Dhaqaalaha Ganacsiga iyo Warshadaha**

Arrimaha ka mida ha hawlahiisa:

a) Ka talbixinta iyo u kuurgelidda Siyaasadda Gancsiga Dalaka
b) Ka talbixinta iyo u kuurgelidda Siyaasadda Horumarinta Warshadaha
c) U Kuurgalka shuruucda ilaalinta xuquuqda gaarka ah ee ganacsiga (Patent rights)
d) U Kuurgalka shuruucda ilaalinta tayada ganacsiga la soo waarido iyo nooca wax soo saarka warshadaha (quality control laws)

## CUTUBKA 9-AAD:

## HABRAACA MAALIYADDA

### Qodobka 68-aad: Hab-raaca Loo Ansaxiyo Miisaaniyadda Federaalka

1. Xukuumadu waxay gudbineysaa qabyo qoraalka Miisaaniyadda federaalka ee sanadkasoo socda ugu dambeyn oktoobar 15-keeda ee sanad walba.
2. Sidoo kale xukuumadu waxay la gudbineysaa qabyo qoraalka Miisaaniyadda federaalka faafaahin qoraal ah iyo qorallada kale ee la xariira qabyo qoraalka Miisaaniyadda sida uusharcigu farayo.
3. Guddoomiyaha golaha wuxuu u gudbinayaa xubnaha qabyo qoraalka Miisaaniyadda, qoraal faafaahinaya miisanayidda iyo wixii qoraallo kale ah ee la xariira qabyo qoraalka Miisaaniyadda sida uu farayo sharciga iyo ogeysiinta furitaanka fadhiga laggu soo bandhigi doona qabyo qoraalka Miisaaniyadda federaalka iyo qoraalka faahfaahinayaba.
4. Warbixinta ku Saabsan Miisaaniyadda iyo qabyo-qoraalka Miisaaniyadda ayuu Wasiirka Maaliyadda ka hor akhrinayaa fadhiga Golaha. Loogamana doodayo fadhigaas.

5. Guddi kasta ama xubno aan ka yareen 10, ayaa gudiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda u soo bandhigi karo soo jeedin wax ka baddal.
6. Wax ka badalka waxaa lagu soo gudbinayaa qoraal uu la socdo faahfaahin sababta keentay soo jeedinta wax ka badalka.
7. Dhamaan soo jeediyayaasha wax ka badalka waa in ay is barbar dhigaan dhakhliga iyo kharashka Miisaaniyadda.
8. 20 Cisha gudahood soo bandhigida qabyo qoraalka Miisaaniyadda ee uu sameynayo wasiirka Maaliyadda, guddiga Maaliyadda iyo Miisaaniyadda waxaa uu mowqif ka qaadanayaa dhamaan dukumeendiyada la horkeenay golaha, ee saameynaya wax ka badalkiisa, kadibna diyaarinayaa warbixin uu u dirayo Gudoomiyaha Golaha si uu u tixgaliyo.
9. Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda wuxuu qaban karaa dhageysi dadweyne ee Miisaaniyadda, ka hor inta uusan gabagabeyn warbixintiisa ku saabsan sharciga qabyoqoraalka misaaniyada federaalka.
10. 30 casho gudahood, soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda kadib, Goluhu wuxuu ka doodayaa warbixinta Guddiga Maaliyadda ee ku saabsan Miisaaniyad sanadeedka. Xukuumadda waxay go'aan ka qaadanaysaa dhammaan wax ka bedelada Goluhu soo jeediyay, kadibna waafajinaysaa qabyo qoraal Miisaaniyadeedka ay soo gudbisay oo isbedel lagu sameeyay, soona hordhigaysa Golaha 15 casho gudahood
11. Qabyo-qoraalka Miisaaniyadda federaalka ee wax ka badalka lagu sameyey wuxuu noqonayaa nuqulka cusub ee Miisaaniyadda federaalka kaas oo xukuumaddu ay ku soo dartay wax ka-badalka ay ogoshahay iyo kan ay u aragto lagama maarmaan. Xukuumadda ayaa soo bandhigeysa warbixin faahfaahsan oo ay ku cadeyneyso qaabka ay u tixgalisay wax ka-badalkii Goluhu soo jeediyay iyo wax ka badalka dheeraadka ah ee ay ku sameysay qabyo-qoraalka Miisaaniyadda federaalka.
12. Guddiga Miisaaniyadda iyo Maaliyadda waxuu mowqif ka qaadanayaa qabyo qoraalka Miisaaniyadda ee wax ka badalka lagu sameeyey kadibna warbixintiisa u soo gudbinayaa Golaha muddo aan ka badneyn 7 maalmood, kadib marka uu helo qabyo-qoraalka wax ka-badalka lagu sameeyey ee miisaniyada Federalka.

13. Golaha ayaa ka doodadayaan kadibna u codeynaya qabyoqoraalka Miisaaniyadda Federaalka ee wax ka-badalka lagu sameeyey.
14. Haddii qabyo-qoraalka miisaaniyadda federaalka la ansixin waayo, Golohu wuxuu xukuumadda u qabanayaa in ay muddo 30 casho ah gudohood ku soo gudbiso  qabyo qoraal miisaaniyadeed cusub.

**Qododka 69-aad: Hab-raaca Lagu Ansixinayo Kabid Miisaaniyadeedka Federaalka Iyo Wax Ka Badalka Miisaaniyadda Federaalka**

1. Dowladu waxaa aay soo jeedin kartaa Kabid miisaaniyadeedka federaalka marka sanad miisaaniyadeedka lagu jiro uu dhexda marayo.
2. Qabyo qoraalka Kabid miisaaniyadeedka federaalka waxaa la galinayaa ajendaha fadhiga Golaha, haddii 10 malmood fadhigaasi ka hore loo sii qeybiyay xubnaha.
3. Qodobbada ku saabsan wax ka badalka qabyo qoraalka Miisaaniyadda federaalka ayaa loo isitcmaalayaa hogaaminta wax ka badalka qabyo qoraalka Kabid misaaniyadeedka meesha ay iskaga midka yihin marka laga reebo waqtiyenta xadideysa soo jeedinta waxka badalka. Wax ka badal waxaa la soo jeedin karaa kama dambeyn sadax maalmood ka hor maalinka fadhiga Golaha.

**Qodobka 70-aad: Habraaca Loo Ansixinayo Warbixinta Xisaab Xir Sanadeedka Kusaaban Miisaaniyadda Federaalka**

1. Iyadoo uu caawinayo xisaabiyaha guud, Xukuumaddu waxaa ay soo diyaarineysaa warbixinta xisaabxir sanadeedka Miisaaniyadda federaalka ee sanadkii la soo dhaafay. Warbixinta waxaa la hor geynayaa Golaha si uu uga doodo, una ansixyo ugu dambeyn 31-da Maarso ee sanadka xiga.
2. Guddoomiyaha Golaha waxaa u gudbinayaa warbixinta xisaab xirka guddiga hantidhowrka iyo xubnaha golaha 15 maalmood ka hor inta uusan Goluhu ka doodin.
3. Dooda ku saabsan warbixinta xisaab xirka waxaa loo kala qeybin karaa mid ku saabsan warbixinta guud iyo mid ku saabsan qeybo ka mid ah Miisaaniyadda. Kadib marka la gabagabeeyo dooda warbixinta xisaab xirka, Goluhu waxaa uu u codeynayaa warbixinta guud ahaan

**Qodobka 71-aad: Habraaca ansixinta miisaaniyad sanadeedka Golaha Shacabka**

1. Waxaa jiri doona Guddiga Adeega Golaha, sida waafaqasan qodobka 111 (d) eeDastuurka, kaasoo u xilsaaran soo diyaarinta qiyaasta miisaaniyad sanadeedka Golaha Shacabka.
2. Qiyaasta waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka si uu uga doodo una ansixiyo. Guddiga ayaa uxilsaaran gacan ku heynta howlaha maaliyadda ee Golaha.
3. Si uu u diyaariyo Qiyaasta Miisaaniyadda:
   a) Xoghaya Guud ee Golaha wuxuu u gudbinayaa Guddiga Adeegga Golaha kutalagal miisaaniyad sanadeedka la xariirta; Gunnooyinka xubnaha iyo mushaaraadka shaqaalaha Golaha, kutala galka kharashaadka Guddiyada, Howlaha Golaha, qalabka iyo dayactirka Golaha.
   b) Guddiga Arrimaha Golaha ayaa ansixinaya qiyaasta loogu tala galey guddiyada Golaha inta aanan loo gudbin Guddiga Adeegga Golaha.
4. Inta laga dhisayo Guddiga Adeega Golaha, Guddiga Joogtada ee Arrimaha Golaha ayaa xilkaas sii heynaya.

**CUTUBKA 10-AAD:**

**KORMEERIDA XUKUUMADDA**

**Qodobka72-aad. U Yeeridda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada**

Golaha waxaa u u yeeri karaa ra'iisul wasaaraha iyo Golaha wasiirada. Golaha Shacabka Federaalka waxaa uu awood u leeyahay in uu dib u eegid ku sameeyo xilka masuul kasta ee aqbali waayo u yeeridda golaha shacabka ee Federaalka.

**Qodobka 73-aad: Kalsooni-Siinta Xukuumadda**

Goluhu wuxuu cod kalsooni ah siin karaa, kalana noqon karaa ra'iisul wasaaraha, Golaha Wasiirada iyo barnaamijka Xukuumadda. Golaha Shacabka wuxuu go'aankiisa ah kalsooni-siinta ku meelmarinayaa codeyn gacan taag ah ee aqlabiyad hal dheeri ah tiradda guud Xubnaha Golaha (50 %+1) sida ku xusan Qod 69(d iyo e) ee Dastuurka.

**Qodobka 74-aad: Dhaarta Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada**

Si waafaqsan qod 104aad ee dastuurka kumel gaarka, kadib marka la helo codka kalsooni siinta, ra'iisul wasaaraha iyo Golaha Wasiirada ayaa inta aysan xilka qaban, dhaar ku maraya fadhi gaar

ah ee golaha shacabka ee Federaalka, Waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha maxkamada sare, loona akhrinayo sida tan:

***"waxaan ku dhaaranayaa magaca Illahay inaan xilkeyga u guto si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diinta ku jirto, dhawrana dastuurka qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u yaalo".***

**Qodobka 75-aad: Codka Kalsooni kala Noqoshada Xukuumadda**

1. Xildhibaano aan ka yareen shan meelood meel (1/5) tirada guud ee xildhibaanada Golaha ayaa soo jeedin kara mooshin kalsooni kala noqosho Xukuumadda, waxaana dooddeedu furmeysaa 5 maalmood kadib oo maalmo shaqo ah kana billaabanaysa maalinta soo jeedinta la keenay Golaha.
2. Mooshinkaasi waxaa lagu ansixinayaa tiro hal dheeri (50%+1) ee xubnaha golaha iyadoo tirada Xubnaha Golaha laga reebayo kuraasta bannaan (Vacant Seats)
3. Soo jeedin (mooshin)la xiriira qodobada 9-aad farqada 2-aad, Qodobka 20-aad Farqadiisa 1-aad, 75-aad farqadiisa 1-aad, 77-aad farqada 1-aad iyo qodobka 81-aad farqada 3-aad ee Xeer-Hoosaadka laguma faafin karo Golaha iyo meelkale toona kahor maalinta ay furmayso dooda soo jeedintaas. Waxaana maalintaas loo qaybinaya Golaha oo kaliya[27]
4. Xildhibaan kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro ama ka baxo soo jeedin mooshin inta aan Gudoonka Golaha loo Gudbin, Mar hadii loogudbiyo gudoonka saxiixayaasha motionka ka ma noqon karaan saxiixooda motion-ka.
5. Marka soo jeedin mooshin la keeno Golaha loona codaynayo Xildhibaanku soo jeedin uu marki hore soo jeediyay wuu ka codayn karaa
6. Marka soo jeedin mooshin loo keeno Gudoonka Golaha waa in uu hubiyo sharcinimada Mooshinkaas isla marka loo dhiibana Go'aan ka gaaro qabashada Soo jeedinta Mooshinka loo Soo gudbiyay
7. Codeynta waxaa laga dhigayaa mid gacan taag ah.

[27] F.G: faqradda 3-aad ilaa iyo 6-aad waa faqroyin cusub oo lagu soo daray qodobkaan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

**Qodobka 76-aad: Soo Jeedinta Kala noqosho Kalsooni**

Haddii soo jeedin kala noqosho kalsooni oo Xukuumadda lid ku ah uu Goluhu ansixin waayey, lama soo celin karo soo jeedintaas kalsooni-darro, ilaa ay ka gudbeyso muddo 6 Bilood ah.

**Qod 77-aad: Su'aal wadareedka *(Interpellation)***

1. Koox 10 xildhibaan ah ayaa soo gudbin kara mooshin ay ku codsanayaan Su'aalwadareed looga doodayo arin la xiriirta howsha Ra'iisul Wasaaraha ama Wasiir.
2. Ajendaha fadhiga waxaa lagu dari karaa hal Su'aalwadareed, taasoo aan ka dheereyn mudo hal fadhi maalmeed ee golaha.
3. Haddii Su'aalwadareedyo ka badan hal ay u dimantahay Golaha, guddiga arimaha golaha ayaa siinaya koox kasta in ay yeelato Su'aalwadareedkeeda iyadoo loo kala hormarinayo sida ay soo gudbintooda usoo kala horeysay mudada fadhiyada soo socda.
4. Su'aalwadareedku waxaa lagu soo gudbinayaa qoraal ahaan, waxaana lagu cadeynayaa arimahan[28]
    a) Nuxurka Su'aasha oo kooban
    b) Sababta keentay mooshinka
    c) Magacyada iyo saxixyada xubnaha soo jeedinaya
5. Su'aal wadareedka waxaa loo gudbinayaa Guddiga Arrimaha Golaha. Islamarka gudigu uu helo qoraalka Su'aal wadareedka, waxaa uu u sii gudbinayaa Xukuumadda, taasoo ku qasbaysa in ay ku soo jawaabto 30 malmood gudaheed.
6. Su'aal wadareedka waxaa lagu darayaa ajendaha todobo (7) maalin gudaheed kadib maalinka jawaabta laga helo Xukuumadda. Guddiga Arimaha Golaha ama Goluhu madiidi karo ku daridda Su'aal wadareedka ajendaha Golaha, marka laga reebo haddii Su'aal wadareedka aaney buuxin shuruudaha rasmiga ee ku xusan faqrada 4aad ee qodobkani.
7. Haddii Xukuumadda ka soo jawaabi wayso Su'aalwadareedka sida ku xusan faqradaha kore, su'aashaasi waxaa wali ahaaneysaa qodobka ugu dambeeya ee ajendaha maalinkaasi socda; markaasoo kooxda soo jeddinta Su'aalwadareedka wadda ay soo

---

28 F.G: faqradda 4-aad ee qodobka 77-aad waxaa wax laga bedelay xarafka (a) oo marki hore u qornaayd sidaan " Koobnaanta qaab jeedinta arinkaas. waxaana loo qoray sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

jedinayaan in go'aan digniin ama canaan ah laga soo saaro Xukuumadda. Haddii Goluhu uu kala maqanyahay su'aashaas waxaa ay ka mid noqoneysaa qodobka ajendaha ugu horeeya ee fadhiga xiga.

8. Kooxda soo jeedisay Su'aalwadareedka waxay xaq u leeyihiin in Su'aasha ay dood ka furaan mudo aanan ka badneyn labaatan (20) daqiiqo. Isla kooxdaas aya xaq u leh in ay dooda soo afjarto mudo aanan ka badneyn toban (10) daqiiqo. Xubnaha kale waxaa ay xaq u leeyihiin inay ka doodaan su'aal wadareedka, si waafaqsan xeer hoosaadka.
9. Ra'iisul Wasaaraha ama Wasiirka ay ku wajahantahay codsiga wuxuu ku qasbanyahay in uu soojediyo fikrada xukuumadda ka qabto arrinta ay su'aal wadareedka ku saabsantahay.
10. Kooxda soo jeedisay Su'aalwadareedka waxaa ay codsan karaan in mooshinka loo codeeyo gabagabada su'aal wadareedka, taaso aan ka baxsaneyn mudada loo qoondeeyey doodaasi, mar haddii mooshiinkaas ay kusii dareen codsigoodi hore ee su'aalwadareedka.
11. Su'aal wadareedka looma gudbin karo kal fadhiga xiga ee Golaha. Laakin soo jeedin kale oo hor leh wa laga sameyn karaa.
12. Codsi ka doodid su'aal wadareed ee ku saabsan isla arrin Kaliya lama keeni karo in ka badan labo (2) jeer sanad gudihiisa.

**Qodobka 78-aad: Suaal oraaheed oo Xukuumadda Looga Codsanayo Jawaab oraah ah**

1. Inta uu Golaha fadhigiisa socdo, ajendaha Axad kasta waa in ay ku jirtaa waqtiga su'aalaha xukuumadda la weydiinayo, oo aan ka badnaaneyn sagaashan (90) daqiiqo.
2. Maal maha shaqo aan Axada ahayn Xubin kasta oo ka tirsan Golaha waxaa uu weydiin karaa suaalo, taaso uu ka jawaabayo xubin ka tirsan xukuumadda waqtiga su'aalaha, mar haddii ujeedada guud ee suuashaashi loo gudbiyey xoghayaha guud iyado qoraal ah mudo aanan ka yareyn 72 (laba todobaatan) saacadood ka hor fadhigaas[29].

[29] F.G: faqradda 2-aad ee qodobka 78-aad oo marki hore u qornaayd sidaan "Xubin kasta oo ka tirsan Golaha waxaa uu weydiin karaa suaalo, taaso uu ka jawaabayo xubin ka tirsan xukuumadda waqtiga su'aalaha, marba haddii suuashaashi loo gudbiyey xoghayaha guud iyado qoraal ah mudo aanan ka yareyn 72 (laba todobaatan) saacadood ka hor fadhigaas" waxaa loo bedelay sida ku xusan kor. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

3. Qaabka su'aasha waa in lagu ixtiraamaa shuruudaha luqada anshaxa leh.
4. Xubinta su'aasha weydinayso ayaa isla su'aashaas akhrinaysa waqtiga suaalaha.
5. Su'aashaas, waa in aysan ka badan mudo hal (1) daqiiqo ah.
6. Jawaabta su'aasha wa in aysan ka badnaan sadex (3) daqiiqo.
7. Xildhibaanadu Su'aal dheeraad ah oo quseeya ujeedadaas waa ay weydiin karaan xubinta xukuumada ka socota, waana ineysan qaadan muddo ka badneyn seddax (3) daqiiqo[30].
8. Jawaab dheeri ah ayaa laga sameyn karaa hadal ahaan, waana inaysan ka badneyn mudo labo (2) daqiiqo..
9. Ra'iisul Wasaaraha waa loo soo jeedin karaa su'aal, Isaguna wuxu u gudbin karaa su'aalkasta mid ka mid wasiiradiisa hadu isagu goa'ansado.
10. Haddii su'aal laga jawaabi waayo labo fadhi gudohood, su'aashaasi waxaa lagu soo daabacayaa madbacada Golaha.
11. Iska –dhega tirida joogta ah ee ka jawaabidda su'aasha Golaha ee la xiriirta faqrada11-aad ee kore ku xusan, waxaa ay keeni kartaa codsi Su'aalwadareed.

**Qodobka 79-aad: Su'aasha xukuumadda Looga Codsanayo Jawaab qoraal ah**

1. Xubnaha waxaa ay su'aal codsi qoraal ah u gudbin karaan Ra'iisul Wasaaraha ama Wasiir arimaha la xiriira howlahooda. Jawaabta waa in lagu so gudbiyaa muddo aanan ka badneyn labo (2) isbuuc kadib maalinka su'aashaasi la soo gudbiyey, waxaana lagu xusayaa qoraalada shirarka Golaha malinka laga jawaabayo, ama maalnka ugu xigta eeuu Goluhu fadhigiisa buuxo yeelanayo.
2. Liiska su'aalaha aan laga jawaabin mudadii loogu talo galay waxaa lagu daabacaya madbacada Golaha loona qeybinayaa xubnha Golaha.

[30] F.G: faqradda 7-aad ee qodobka 78-aad oo marki hore u qornaayd sidaan " Su'aal dheeraad ah waa la weydiin karaa xubintaas xukuumada ka socota, waana ineysan qaadan muddo aan ka badneyn labo (2) daqiiqo" waxaa loo qoray sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

[31] F.G: faqrada 9-aad ee qodobka 78-aad oo u qornaayd sidaan " Xubinta soo gudbisay su'aal waafaqsan xeer hoosaadka, waxay xaq u lahaaneysaa inay su'aashaasi weydiso xukuumadda xitaa haddii xukuumadda aysan soo diyaarin jawaab" waa laga saaray qodobka. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013

**Qodobka 80-aad: Duljoogga ay sameynayaan Guddiyada Golaha**

1. Si loo xaqiijiyo dhaqangalinta shuruucda qaranka, guddiyada Golahu waxaa ay laxisaabtamayaan, ayna kormeerayaan howlaha waaxyada dowladda iyo hey'adaha kaleee hoos yimaada xilkooda, sida waafaqsan qodobka 60 ee xeer hoosaadka Golaha.
2. Haddii wasaarad, ama hey'ad kale ee hoos timaadda shaqada guddi Golaha shacabkaaysan warbixin keenin ama warbixinteedu aysan dhameystirneyn, marka uu guddigucodsiga sameeyey kadib, waxaa arintaasi lagu dari karaa ajendaha Golaha.
3. Guddiyada waxaa ay uga soo warbixinayaan Golaha dhaqangalka shuruucda ay shaqada ku leeyihiin warbixintooduna waxaa ay noqoneysa qoraal iyo hadal labadaba, sanadkiiba hal mar.

**CUTUBKA 11-AAD:**

**QODOBO ISKUJIR AH (MISCELLANEOUS)**

**Qodobka 81-aad: Guddiyadda Madaxbannaan**

1. Haddii sida ku cad Qodobka 69-aad iyo 112-aad ee Dastuurka uu Ra'isul Wasaaraha ama wasiirka ay khuseyso soo jeediyo magacyada guddiyada madaxabannaan (independent commissions), Guddoomiyuhu wuxuu ku wargelinayaa Golaha magacyada Guddiyada la soo jeediyey; wuxuuna 30 cisho gudahood oo ka bilaabata taariikhda soo jeedintu soo gaartay Golaha- ku soo qabanqaabinayaa fadhiga Golaha oo looga doodayo laguna ansixinayo ama lagu diidayo magacyadaas.
2. Ansixinta Golaha kadib, magacyada waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha jamhuuriyada Soomaliya sii uu xeer uga soo saaro.
3. Goluhu wuxuu u yeeri karaa guddoomiyayaasha Guddiyada madaxa banaan iyo xafiisyada. Golaha Shacabku wuxuu awood u leeyahay in uu dib u eegis ku sameeyo xilka mas'uul kasta oo jawaab celin sameyn waaya marka uu Goluhu u yeero.
4. Xilka warbixinta Guddiyada madaxa banaan waxaa hagaya sharciyada dhisaya Guddiyadaas.

5. Guddiyaada Golaha Shacabku wuxay mas'uul ka yahiin dib u eegista warbixinada Guddiyada madaxa banaan waqti kasta, kuwaasoo warbixintooda u gudbinayo Golaha Shacabka.
6. Ugu yaraan sanadkiiba mar, Guddiyada madaxbanaan waa in ay warbixinta howlahooda qoraal iyo bandhigis oraah ahba ugu soo gudbiyaan Golaha Shacabka.

**Qodobka 82-aad: Maamulka Golaha Shacabka**

1. Shaqaalaha Golaha Shacabka waxay ka mid yihin shaqaalaha dowlada islamarkaasina yihin xubin muhim ka ah shaqaalaha rayidka ee dowladda. Toos waxaa u shaqaleysta Golaha hadba sida baahidiisa, iyo shurudaha loogu tala galay sida uu cadeeyo Gudiga Arrimaha Golaha.
2. Xilalka iyo isku dubbaridka shaqaalaha Golaha waxaa lagu hagaya xeer maamuleed oo gooni ah sida uu u soo jeediyo Guddiga Arrimaha Golaha uuna u ansixiyo Golaha Shacabka.
3. Shaqalaha Golaha waxaa ay hoos imanayaan Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka kaasoo kormeeraya, qiimaynaya shaqaadooda, amarkiisana ay ku shaqeynayaan. Xoghayaha ay ka mid tahay howshiisha arimaha ku saabsan maqaamkooda iyo marxaladooda shaqo.
4. Qiimaynta shaqada, dalacsiinta, tilaabooyinka anshaxa iyo kala wareejinta shaqalahawaa in ay waafaqsanaadaan xeer maamuleedka Golaha.
5. Ilaa inta laga sameynayo Guddiga Adeega Golaha, Xoghayaha Guud ee golaha waxaa magacaabistiisa soo jeedinayaa Guddoomiyaha Golaha isagoo la tashaday Ku-Xigeenadiisa, waxaana ansixinaaya Guddiga Joogtada.
6. Xoghayaha Guud ayaa ah masuulka ugu sareeya ee u xilsaaran maamulida arrimaha Golaha, islamarkaasna u xil saran arimaha la xiriira heykalka maamul, farsamo iyo dhaqaale isago ka amar qaadanaya Gudoomiyaha Golaha islamarkaasna waafajinaya xeer mamuleedka uu ansixiyay Golaha Shacabka.

**Qodobka 83-aad: Ku Dhawaaqida Xaalada Degdega ah**

Golaha Shacabka waxaa uu ansixin karaa ama dheereyn karaan xaalada dagdag ah si waafaqsan qodobka 131 faqradiisa 3aad ee Dastuurka kumeel gaarka.

**Qodobka 84-aad: Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka**

1. Xeer---hooosaadka Golaha Shacabka waxuu dhaqan galayaa kadib ansixinta cod aqlabiyad 50% + 1 ee xubnaha Golaha uuna saxiixay Guddomiyaha Golaha Shacabka iyo ku Xigeenadiisa[32]
2. Xeer-hoosaadka waxaa wax ka badal lagu sameyn karaa kadib markii ay mooshin soo jeeediyaan ugu yaraan 10 xildhibaan, ayna ku taageeraan cod aqlabiyad ah (50%+1) tirada guud xubnaha Golaha.
3. Laalista qodobada xeer hoosaadka waxaa go'aamin kara aqlabiyad sadax dalool labo(2/3) ee Golaha Shacabka, haddii aysan ka hor imaneyn faritaanada Dastuurka
4. Xeer-hoosaadkan wuxuu leeyahay awood sharci.

**Qodobka 85: Laalis**

1. Qodob kasta oo ka tirsan Xeer-hoosaadkan ee la xiriira hawlahaan ama hab-socodka fadhiyada Golaha ama Guddi ka mid ah ee Golahan, waxa lagu laali karaa qaraar ka soo baxa isla Golaha
2. Laalis kasta oo ku saabsan qod waxay ku koobnaanaysaa oo keliya ujeedada tooska ah oo laalista la ansixiyay ku beegan.

**Qodobka 86: Reebbanaanta hoos u dhigista iyo xaddidaada awoodda xeerkan**

Ma jiro Heshiis ama xeer dhaqan oo xadidi kara ama wax u dhimi kara qodobada xeer-hoosaadkan

---

[32] F.G: faqradda 1-aad ee qodobka 84-aad oo u qornaayd sidaan " Xeer-hooosaadka Golaha Shacabka waxuu dhaqan galayaa kadib ansixinta cod aqlabiyad 2/3 ee xubnaha Golaha uuna saxiixay Guddomiyaha Golaha Shacabka" waxaa loo bedelay sida kor ku xusan. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013.

[33] F.G: Qodobka 85-aad oo ka hadlayay Xaalada lama filaanka ah waa laga saaray Xeer-Hoosaadka. Golohu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3aad kulan kiisii 19aad ee 23/10/2013.